Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGAAH
# الجريدة الرسمية
# OFFICIAL BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka8aad Muqdisho, 10 July2020 Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo.Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee WasaaraddaMaaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

## Bilaha

# March - Juun

# 2020

**SHARCI Lr.27** Taariikh: 30/03/2020
ANSIXINTA SHARCIGA JAAN-GOYNTA & TAY-DHOWRKA SOOMAALIYEED
**Lifaaq**: *Ansixinta Sharciga Jaan-goynta & Tay-Dhowrka Soomaaliyeed*
**Bog 3**

**SHARCI Lr.28** Taariikh: 19/05/2020
ANSIXINTA SHARCIGA DUULISTA RAYIDKA
**Lifaaq**: *Ansixinta Sharciga Duulista Rayidka* **Bog 24**

**XEER MADAXWEYNELr.248** Taariikh: 17/02/2020
MAGACAABISNOOTAAYO **Bog 88**

**XEER MADAXWEYNELr.254** Taariikh: 16/03/2020
MAGACAABIS XUBNAHA CUSUB EE GUDDIGA MAAMULKA BANGIGA DHEXE **Bog 89**

**XEER MADAXWEYNELr.259** Taariikh: 06/04/2020
MAGACAABIS LA-TALIYE MADAXWEYNE DHINACA SHARCIGA **Bog 90**

**XEER MADAXWEYNELr.267** Taariikh: 20/05/2020
MAGACAABIS AGAASIMAHA HAB-MAAMUUSKA MADAXTOOYADA
**Bog 91**

**XEER MADAXWEYNELr.273** Taariikh: 20/06/2020
MAGACAABIS MAAREEYAHA GUUD EE HEY'ADDA DUULISTA RAYIDKA **Bog 92**

**SHARCILR.27** Taariikh:30/03/2020

**ANSIXINTA SHARCIGA JAAN-GOYNTA &TAYA-DHAWRKA SOOMAALIYEED**

## MADAXWAYNAHA J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka “F” ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/254/12/01//B-10/20 Taariikh: 16/01/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Jaan-goynta & Taya-dhawrka Soomaaliyeed

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

***Waxa Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:***

### Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaadaySharciga Jaan-goynta & Taya-dhawrka Soomaaliyeed

### Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 30/03/2020**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/059/2020
TAARIIKH 30/6/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA JAAN-GOYNTA IYO TAYO-DHAWRKA SOOMAALIYEED

## QEYBTA 1AAD
## MAGAC, UJEEDDO, ERAY-BIXIN, BAAXADDA IYO AWOODDA SHARCIGA

### QODOBKA 1aad
### MAGACA SHARCIGA

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "**Sharciga Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrkaSoomaaliyeed"** (Somali Standards and Quality Control Act).

### QODOBKA 2aad
### UJEEDDADA SHARCIGA

Ujeedda**da** Sharciga Jaan-goynta iyo Tayo-dhowrka Soomaaliyeed waa;

1. In uu horumariyo siyaasadda Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrka Qaran, iyo In uu daboolo baahiyada loo qabo xeerarka jaangooyooyinka, cabir**r**ada, baarista iyo hubinta tayada badeecadaha.

2. In lagu **hago** xeer-nidaaminta tayo-dhawrka ee lagu maamulo tayada badeecadaha iyo adeegyada, sida kuwa soo gala Dalka ama la**ga** dhoofiyo iyo kuwa gudaha Dalka laga soo saaro ama laguisticmaalo.

3. In uu ilaaliyo bad-qabka qofka ama bulshada, caafimaad ahaan iyo dhaqaaleahaan;

4. In lagu dhiso Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed;iyo

5. In uu sugo kalsoonida isticmaalaha iyo nabadgelyadiisa, isla markaana wuxuu abuurayaa kalsooni lagu qabo tayada badeecadda dalka soo-gasha, midda ka dhoofta iyo tacabka dalka laga soo saarointaba.

## QODOBKA 3aad
## QEEXID

Erayadan halkan ku xusan waxaa loo micnaynayaa sida soo socota haddii aan si kale loogu qeexin Sharcigan dhexdiisa:

1. **"Hay'adda Tayo-dhawrka":** waxaa loola jeedaa Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed (Somali Bureau of Standards - SoBS).

2. **"Adeeg":** waxaa loola jeedaa bixinta baahida bulshada ee aan la taaban karin;

3. **"Agab":** waxaa loola jeedaa dhammaan badeecadaha kala duwan ee dalka la keeno**,** laga dhoofiyo ama lagasoo-saaro.

4. **"Anfaaci":** waxaa loola jeeda wax kasta oo la quuto;

5. **"Baaris":** waxaa loola jeedaa daba-galka rasmiga ah oo ay hay'addu sameyso si looogaado in loo hoggaansamay sharciyada Hay'adda iyo kuwa dalka guudahaan;

6. **"Been-abuurad":** waxaa loola jeedaa samaynta walxo qiimo-hoodu liito loonaekaysiiyay kuwo qiimahoodu sareeyo;

7. **"Cabbiraad"**: waxaa loola jeedaa hab cilmi qiyaaseed lagu ogaado tilmaamahadherer, mug, cuf iyo wixii lamid ah oo ay leeyihiinwalxuhu**;**

8. **"Dhawridda"**: waxaa loola jeedaa ilaalinta heerka tayo-wanaagga dhammaanbadeecadaha dalka ka baxa, soo galaya ama kadhoofaya;

9. **"Dhoofin":** waxaa loola jeedaa u dirista dal kale alaab ama adeeg yaala Dalkagudihiisa**;**

10. **"Gole":** waxaa loola jeedaa xubnaha Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed;

11. **“Hal-beeg caalami”:** waxaa loola jeedaa heer tayeedka ama jaan-gooyada ay oggolaatay Hay’adda tayo-dhawrka caalamka (ISO);
12. **“Hal-beeg”:** waxaa loola jeedaa summad la xafiday oo lagu dabaqayo hannaanka caddaynta agabka ee tilmaamaya helitaanka kalsooni ku filan agabka amaadeegga;
13. **“Hal-beeg Qaran”:** waxaa loola jeedaa heer tayeedka ama jaan-gooyada ay oggolaatay Hay’adda tayo-dhawrka Soomaaliyeed.
14. **“Heer-tayeedka”:** waxa loola jeedaa summad la xafiday oo lagu dabaqayo hannaanka caddaynta agabka ee tilmaamaya helitaanka kalsooni ku filan agabka amaadeegga;
15. **“Jaan-gooyada”:** waxaa loola jeedaa summad la xafiday oo lagu dabaqayo hannaanka caddaynta agabka ee tilmaamaya helitaanka kalsooni ku filan agabka amaadeegga.
16. **“Joojin”:** waxaa loola jeedaa diidmada agabka ku dhaca in uu buuxin waayo heerar tayeedka iyo shuruudaha looga baahan yahay;
17. **“Kormeere”:** waxaa loola jeedaa shaqaale ka tirsan Hay’adda oo hawshiisu tahay daba-galka hawl si gaar ah looguxilsaaray;
18. **“Shahaadada tayada”:** waxaa loola jeedaa qoraal rasmi ah oo kasoo baxay Hay’addatayo-dhawrka Soomaaliyeed kaas oo qeexaya heerka tayada walxaha lagahadlaayo;
19. **“HTS” (SoBS):** waxaa loola jeedaa Hay’adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed (Somali Bureau of Standards oo lasoogaabiyey;
20. **“Summadda tayada”:** waxaa loola jeedaa xaraf ama xarfo qoraal ama sawir iyo wixii la mid ah taas oo macno gaar ah u leh Hay’adda Tayo-dhawrka oo tilmaameysa tayadawalxaha;
21. **“Tayada”**: waxaa loola jeedaa tilmaan lagu garto heerka sarreynta ama hooseynta walxaha;iyo

22. **“Tayo-dhawrka”:** waxaa loola jeedaa ilaalinta heerka tayada walxaha.

## QODOBKA4aad
## KU DHAQANKA SHARCIGAN

**1.** Sharcigan waxaa lagu maamulayaa dhammaan howlaha Jaangooyoyinka, cabirrada iyobaaridda.

**2.** Sharcigan waxaa Lagu dhaqayaa tayada badeecadaha ama adeegyada soo-gala Dalka, kuwa laga-dhoofiyo iyo kuwa lagu isticmaalo Dalkagudahiisa.

## QEYBTA 2AAD
## HAY’ADDA TAYO-DHAWRKA

## QODOBKA 5aad
## DHISMAHA HAY’ADDA TAYO-DHAWRKA SOOMAALIYEED

1- Si loo gaaro ujeeddooyinka ku xusan qodobka 2[aad]ee Sharcigan, waxaa Sharcigan lagu dhisay “**Hay’adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed”** (Somali Bureau of standards - SoBS) si waafaqsan dastuurka **KMG**, taasoo mas’uul ka noqonaysa maamulka iyo nidaaminta Tayo-dhawrka badeecadaha soo gala dalka, kuwa la dhoofiyo iyo kuwa gudaha Dalka laga soo saaro ama lagu isticmaalo.

2- Hay’adda waxay leedahay shaqsiyad-qaanuuneed iyo astaan u gaar ah.

## QODOBKA 6aad
## XARUNTA HAY’ADDA

Xarunta Hay’addu waa Caasimadda Jamhuuruyada Federaalka Soomaaliya ee Muqdisho, waana in ay xafiisyo ku yeelataa dhammaan magaalo madaxyada Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah **Dowladda** Federaalka iyo xuduudaha laga soo galo dalka.

# QODOBKA 7aad
# XILKA IYO WAAJIBAADKA HAY'ADDA

Hay'addu, iyadoo raacaysa sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka, waajibaadkeeda waxaa ka mid ah:

1- In ay dajiso siyaasad, Xeer-hoosaad, hab-raacyo iyo jaan-goyn sharciga waafaqsan oo lagu cabbiro tayada cuntooyinka iyo badeecadaha lagu isticmaalayodalka.

2- In ay baarto ayna hubiso cuntooyinka iyo badeecdaha kale ee dalka la-keenayo in ay san xanbaarsanayn khatar iyo halis waxyeelo u geysan kara shacabka.

3- In ay diyaariso halbeegyo (standards) iyo cabbirro looga hor-tagayo waxyeelooyinka caafimaad oo ay u keeni karaan bulshada cuntooyinka iyo daawooyinka dhacay, kuwa tayadoodu hooseeyso ama si u la kac ah tayadooda hoos loogudhigay.

4- In ay hubiso tayada wax soo saarka gudaha dalka, si loo ilaaliyo caafimaad ahaan iyo dhaqaale ahaan shacabkaSoomaaliyeed.

5- In ay qeyb ka noqoto habraaca sharci siinta shirkadaha baarayabadeecadaha (Quality Control Companies) ee ka hawl-galaJFS.

6- In ay abuurto Sheybaar Qaran oo lagu hubiyo tayada badeecooyinka iyo agabka dalka la soo geliyo ama laga dhoofiyo.

7- In ay bixiso shahaadooyin dhiiri gelin wanaag iyo astaamo tayo (QualityMark).

8- In ay kor-u-qaaddo wacyiga bulshada ee ku aaddan hal-beegyada iyo Tayo-dhawrka.

# QODOBKA 8aad
# MADAX-BANNAANIDA HAY'ADDA

Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed waa hay'ad madax-bannaan marka ay gudanayso waajibaadkeeda shaqo si waafaqsan Sharcigan,

waxayna leedahay shaqsiyad-qaanuuneed, waxayna maamul ahaan hoostageysaa Wasaaradda Ganacasiga iyo Warshadaha.

## QODOBKA 9aad
## MIISAANIYADDA HAY'ADDA

1. Miisaaniyadda Hay'addu waxay ka mid tahay miisaaniyadda guud ee Qaranka.

2. Hay'addu waxay u madax-bannaan tahay maamulka miisaaniyaddeeda iyadoo raacaysa Xeerka maamulka miisaaniyadda ee XukuumaddaJFS.

## QODOBKA 10aad
## QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA IYO MUDDADA XIL-HAYNTA GOLAHA HAY'ADDA

Qaab-dhismeedka Hay'adda Tayo dhowrka Soomaaliyeed ee SoBS waxa uu noqonayaa sida soo socta:-

**1.** Gole maamul (Board of Directors) oo ka kooban 13 xubnoodoo **ugu yaraan 3 ka mid ah ay yihiin haween:**

   a) toban (10) xubnood oo xirfadlayaal sare ah **oo aqoon u leh shaqada Hay'adda uu metelayo, kuwaas** oo ka kala yimid: Wasaaradaha shaqada ku leh Tayodhowrka sida Wasaaradda Ganacsiga, Beeraha, Xanaanadda Xoolaha, Caafimaadka, Hawlaha Guud, Kaluumaysiga, wasaarada gaadiidka, wasaaradda biyaha iyo tamarta, wasaaradda batroolka iyo hay'adda Bey'ada, oo min xubinah.

   b) Xubin ka imaaneysa ganacsatada (Rugtaganacsiga.)

**2.** Sidoo kale hay'addu waxay yeelaneysaa Maareeye, Maareeye Xigeen iyo waaxyo kala duwan oo mid walba leedahay xil iyo waajibaadcad.

**3.** Muddada Xil-haynta Golaha Maamulka (Board of Directors) markalagareebomaareeyahaiyomaareeyekuxigeenkawaaafar (4) sano oo hal mar loo cusboonaysiin karo.

4. Golaha Maamulka Hay'adda Tayo dhowrka (Board of Directors) waxay iska dhex dooranayaan Gudoomiyaha Golaha laakiin Maareeyaha iyo Maareeye kuxigeenku isuma sharaxi karaan xilka Guddoomiyaha.

## QODOBKA 11aad
## SHURUUDAHA XUBINNIMADAGOLAHA

1. Inuu yahay **/ ay tahay** Muwaadin Soomaaliah.
2. In aysan da'diisa**/da'deeda** ka yarayn **30 (Soddon)** sano.
3. In uu haysto**/haysato** Shahaado heer jaamaceed oo la aqoonsan yahay.
4. In uu leeyahay**/leedahay** khibrad shaqo ugu yaraan muddo **5 (Shan)** sano ah marka laga reebo Maareeyaha iyokuxigeenkiisa.
5. In uu**/ay** dhimir ahaan caafimaadqabo.
6. In ay san maxkamadi ku **xukumin** fal da**m**biyeed shantii sano ee u dambeysay.

## QODOBKA 12aad
## XILKA IYO WAAJIBAADKA GOLAHA MAAMULKA (BOARD OF DIRECTORS)

1. Waxay qiimeynayaan ka dibna ansixiyaan halbeegyada iyo cabirrada tayodhowrka ay soo bandhigaan maareeyaha iyo gudiyada farsamada ee Hay'daha Tayo-dhowrkaSoomaaliyeed.
2. Waxay meel-mariyaan miisaaniyada, qaab dhismeedka waaxyaha iyo Qorshe-hoowleedka Hay'adda kaddib marka uu horkeeno Maareeyaha.
3. Golaha maamulka iyaga iyo maareeyaha waa in ay ku soo saaraan shirkooda ugu horreeya xil howleedka maareeye ku xigeenka iyo agaasime waaxeedyadahay'adda.
4. Waxay ku kormeeraan Maamulka hay'adda fulinta howlihii loo ansixiyay.

## QODOBKA 13aad
## XIL HEYNTA MAAREEYAHA IYO MAAREEYE KU-XIGEENKA

Maareeyaha iyo Maareeye kuxigeenka Hay'adda Tayo-dhowrka Soomaaliyeed waxay xilka haynayaan mudo shan (5) sano oo la cusboonaysiin karo.

## QODOBKA 14aad
## SHURUUDAHA MAAREEYAHA IYO KU-XIGEENKIISA

1. Maareeyaha iyo Maareeye kuxigeenka Hay'adda Tayo-dhowrka Soomaaliyeed waa in ay ahaadaan xirfadlayaal sare oo aqoon iyo qibrad u leh hawlaha hay'adda iyomaamulka.
2. In ay leeyihiin shahaado Jaamacad ugu yaraan heerka 1aad.
3. Waxaa soo xulaya oo Golaha Wasiirada hor keenaya Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyoWarshadaha.

## QODOBKA 15aad
## XILKA IYO WAAJIBAADKA MAAREEYAHA HAY'ADDA SoBS

1. Maareeyaha Hay'adda Tayo dhowrka Soomaaliyeed waa masuulka ugu sarreeyo Hay'adda kaddib Golaha Maamulka, waana hagaha iyo madaxa maamulka hay'adda Tayo dhowrkaSoomaaliyeed.
2. Waxaa uu masuulka yahay fulinta howl-maalmeedkaHay'adda.
3. Waxaa uu ku matalaa magaca hay'adda xiriirka ay la leedahay Hay'adaha kale ee Dowladda iyo Xiriirka Hay'adaha caalamigaah.
4. Waxa uu diyaariyaa, fuliyaana qorsha-howleedka hay'adda kaddib markay ansixiyaan Golahamaamulka.
5. Wuxuu u kuur-galaa fulinta dhammaan hawlaha Hay'adda ee ku cadsharcigan.

6. Wuxuu u gudbiyaa Wasaaradda Ganacsiga qorsho-sanadeedka Hay'adda;

7. Waxa uu magacaabayaa agaasimayaasha waaxyaha Hey'adda iyo Madaxda. Xafiisyada Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ka dib marka uu kala tashado Wasiiradda Ganacsiga ee MaamulGoboleedyada.

8. Wixii kale ee Sharcigan iyo xeer-hoosaadka hay'addu uxilsaaro.

## QODOBKA 16aad
## MAS'UULIYADDA MAAREEYE KU-XIGEENKA

1. Wuxuu buuxiyaa kaalinta Maareeyaha marka uu maqan yahay ama ay ku yimaadaan duruufo ka hor-istaagi kara gudashada waajibaadkiisa.

2. Wuxuu qabanayaa wixii kale ee uu Maareeyuhu uxilsaaro.

## QODOBKA 17aad
## KULAMADA GOLAHA HAY'ADDA

**Golaha** Hay'adda Tayo-dhawrka wuxuu yeelan karaa shir caadi ah iyo shir aan caadi ahayn haddii loo baaahdo, waxayna u dhici karaan sida soo socoto:

1. Kulamada caadiga ah ee Golaha waxay noqonayaan sadexdii bilba mar. haddii aysan Goluhu go'aansan in la qabto waqti ka duwan, waxaana isugu yeeraya guddoomiyahagolaha.

2. Guddoomiyuhu wuxuu isugu yeeri karaa kulan deg deg ah oo aan caadi ahayn haddii loo baahdo, sidoo kale haddii ay isku raacaan 2/3 (saddex meelood labo meel) xubnahaGolaha.

3. Kulanka wuxuu ku ansaxayaa marka ay ka soo qeyb-galaan aqlabiyadda xubnaha Golaha Maamulka Hay'adda Tayo-dhawrka,

waxayna go'aanka ku gaarayaan 2/3 (saddex meelood labo meel) ee tirada guud ee xubnaha Golaha.

**4.** Kulamada caadiga ah xubin kasta waxay xaq u leedahay in la soo gaarsiiyo ajendaha shirka ugu yaraan 24 (labaatan iyo afar) saac ka hor inta uusan qabsoominShirka.

**5.** Goluhu wuxuu fadhigiisa ku marti-qaadi karaa Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga ama wasiir kale oo ka mid ah Wasaaradaha wada shaqaynta la leh iyo qof kasta oo kasoo qeyb-galkiisa ay u arkaan muhiim, isaga oo aan la heyncod.

## QODOBKA 18aad
## GUNNADA XUBNAHA GOLAHA

1. Golaha Maamulka hay'addu Shaqadoodu waa shaqo waqti dhimman **(Part- time**), mana laha Mushahaar joogto ah waayo waa shaqaale dawladeed, marka laga reebo Maareeyaha iyo Ku-xigeenkiisa.

2. Sedax iyo tobanka (13) xubnood waxa keliya oo ay xaq u leeyihiin gunno lagu siinayo fadhiyadooda oo looga bixinayo kharashka ku galay ka soo qaybgalka kulamada.

3. Gunnada xubnaha Goluhu (board of Directors) ku helayaan fadhiyadooda waxaa lagu qeexi doonaa xeer nidaamiye uu ku soo saaridoono wasiirka ganacsiga iyowarshadaha.

## QODOBKA 19aad
## MASUULIYADDAXOGHAYNTA

Hay'addu waxay yeelanaysaa xog-hayaha Golaha maamulka oo aan ka mid ahayn Golaha, shaqadiisuna tahay sida soosocoto:

1. Wuxuu keydiyaa, ilaaliyaana documentiyada maamulka iyo xog sireedka eehay'adda.

2. Wuxuu diyaariyaa ajandaha shirka Golaha maamulka (Board of Directors) kaddib marka uu kala tash**ado** maareeyaha, isla markaana qoraa doodda shirka, isku dubaridaa gaarsiiyaana xubnaha kale eeGolaha.

3. Waxaa uu gaarsiiyaa xubnaha Golaha Maamulka, fariimaha loo baahan yahay kaddib markuu ka helo maareeyaha amarka ah in la gaarsiiyo.

4. Waa madaxa uga hooseeyo maareeyaha iyo ku xigeenkiisa maamulka howlaha xafiiska isla markaana ah isku xiraha xafiiska iyo hay'adaha kale si waafaqsanxeerkan.

## QODOBKA 20aad
## WADA-SHAQEYNTA HAY'ADDA IYO WASAARADDA

**1.** Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed waxay wada shaqayn iyo la-tashiyo joogta ah la yeelan doontaa Wasaaradaha Dawladda, Dawlad-goboleedyada dalka, Maamulka Gobolka Banaadir, haya'daha Amniga Qaranka iyo ganacsatada Soomaaliyeed; iyo

**2.** Hay'adda tayo-dhawrka waxay wada-shaqayn joogta ah la yeelanaysaa hay'adaha dawladda si loo waafajiyo Sharciga tayo-dhawrka Soomaaliyeed **iyo** shuruucda kale eedalka.

## QODOBKA 21aad
## SABABAHA LAGU WAAYI KARO XILKA

Dhammaan shaqaalaha Hay'adda waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda:

**b.** Geeri

**t.** Is-casilaad la aqbalay

**j.** In caafimaad-darro awgeed u-gudan waayo waajibaadkiisa;

**x.** In lagu helo danbi la xariira shaqadiisa ama maxkamadi xukunto.

## QODOBKA 22aad
## GUDDIYO FARSAMO

1. Hay'addu waa in ay yagleeshaa guddiyo farsamo oo aqoon iyo takhasus lagu sooxulay.

2. Guddiyadan farsamo waxaa magacaabaya Maareeyaha Hay'adda isagoo la tashanaya GolahaHay'adda.

## QODOBKA 23aad
## SHAQOOYINKA GUDDIYADA FARSAMO

1. In ay diyaariyaan hal-beegyo iyo Jaangooyooyin faahfaahsan lanafahmi karo kaas oo la xiriira xirfadaha kala duwan ee tayo-dhowrka looga baahanyahay.

2. In ay daraaseeyaan hal-beegyada iyo Jaangooyooyin caalamiga ah,kuwa gobolka iyo ka talo-bixinta sida loogu qaadan karo hal-beegyadaas in ay noqdaan kuwoSoomaaliyeed;

3. in ay joogteeyaan dib u eegista halbeegyada iyo jaangoynta Soomaaliyeed iyo soo jeedinta wax kabadalka howl kasto oo muhiim u ah diyaarinta halbeegyada loobaahnyahay.

4. In la caddeeyo digniinaha luqadaha qalaad ee ku suntan agabka iyo anfaaciga iyo dhammaan badeecadaha keeni kara halis caafimaad, dhaawac iyodhimasho.

## QODOBKA 24aad
## CODSIGA IYO ILAALINTA XOGAHA

**1.** Hay'adda tayo-dhawrka Soomaaliyeed waa Hay'adda kaliya ee u xilsaaran xogta khuseeysa hal-beegyada iyo tayo-dhawrka Soomaaliya.

**2.** Ciddii u baahan Xog ku saabsan hal-beegyada Soomaaliya waxay ka dalban karaan oo kaliyaHay'addaan.

**3.** Hay'adda waxay ilaalinaysaa sirta ganacsi iyo xogta kale ee qarsoodiga ah oo ay ka soo ururisay shirkadaha si waafaqsan sharcigan iyo shuruucda kale eedalka.

## QEYBTA 3AAD
## HAL-BEEGYADA TAYO-DHAWRKA
## QODOBKA 25aad
## UJEEDDADA TAYO-DHAWRKA

Tayo-dhawrka waxaa loola jeedaa:

1. Caddeynta in badeecada ama adeeggu waafaqsan yahay halbeega Dalka, gobolka iyo midkaCaalamiga.
2. In ganacsatada loo fududeeyo sidii ay u xulan lahaayeen agab iyo adeeg waafaqsan halbeegyada Dalka, gobolka iyo kuwa Caalamiga ah.
3. Kor-u-qaadidda tartanka tayaysan ee agabka iyo adeegyada heer Qaran iyo heer Caalami;iyo
4. Abuuridda jawi ay si xor ah oo badeecooyinku isaga gudbi karaan Soomaaliya iyo suuqyadacaalamiga.

## QODOBKA 26aad
## HAL-BEEGYADA TAYO DHOWRKA EE SI KMG AH LOOGU SHAQEYNAYO

Hay'adda tayo-dhawrka Soomaaliyeed waxay si ku meel gaar ah ugu shaqeynaysaa mid kamida ah hal-beegyada caalamka ee la aqoonsanyahay oo la waafajiyey **Shareecada Islaamka** (Halal Standards) intii laga dhameystirayo xeerar iyo halbeegyo buuxa oo Soomaaliya leedahay.

## QODOBKA 27aad
## HABABKA DIYAARINTA HAL-BEEGYADA IYO ANSIXINTOODA

1. Guddiga farsamo waxay u soo-gudbinayaan hal-beegyada ay diyaariyeen Maareeyaha Hay'adda, markuu daraaseeyo kaddib wuxuu u bandhigayaa Golaha maamulka ee Hay'adda.
2. Marka ay isla oggolaadaan Golaha Hay'adda tayo-dhawrka soomaaliyeed, waxaa lagu soo saarayaa hal-beegyadaas Faafinta rasmiga ah sidaas ayayna ku dhaqangalayaan.

## QODOBKA 28aad
## DIIWAANKA HAL-BEEGYADA

1. Hay'adda tayo-dhawrka waxay yeelaneysaa diiwaan u gaar ah hal-beegyada Tayo-dhawrkaDalka.
2. Marka wax laga badalayo ama lagu darayo waxaa lagu cadeynayaa diiwaanka dhammaan Isbadalada iyo qaabka ay u dhaceen.

## QODOBKA 29aad
## FAAFINTA HAL-BEEGYADA

1. Waxaa waajib ah in lagu faafiyo faafinta rasmiga ah iyo warbaahinta dhammaan hal-beegyada cusub ujeedooyinkooda, tixraacooda, taariikhda la ansixiyay iyo faahfaahinta loo baahan-yahay oo dhan.

2. Goluhu wuxuu wax-ka-beddel ku sameyn karaa ama uu ka saari karaa Halbeeg ama jaangooyo hore loofaafiyey.

## QODOBKA 30aad
## HAL-BEEGYADA KHASABKA AH

1. Golaha Hay'adda Tayo-dhawrka waxay awood u leeyihiin ayagoo ku saleynayo talo-bixinta guddiyada farsamo, in ay soo saaraan hal-beegyo ama jaangooyooyin lagu xakameynayo badeecooyinka xariir toos ah la leh noolaha iyo bay'ada

2. Waxaa reebban soo dhoofinta, soo-saaridda ama dhoofiska badeeco hal-beegeedda uusan waafaqsaneyn kan lagu caddeeyay go'aannada iyo faafinta rasmiga ah eeHay'adda.

3. Waxaa reebban Isticmaalka summadda ama astaanta tayada Hay'adda ayadoon loo haysan oggolaanshocad.

4. Waxaa reebban in Dalka lasoo galiyo ama laga dhoofiyo agab ama anfac been abuur ah ama tayadeeda lagabeen-sheegay.

5. Waxaa reebban in Dalka lasoo galiyo agab ama anfaaci taariikhdeedu dhacsan tahay ama ka mid ah badeecadaha daaha oo dhicitaankeedu ka dhimantahay wax kayar hal sano.
6. Agabka ama anfaaciga muddada isticmaalkiisu (shelf life) ay ka yartahay hal sano waa inuusan ka yaraan waqtiga u harsan marka uu soo galayo dalka 50% (boqolkiiba konton) guud ahaan waqtigiisa nolosha.

7. Qofkii ku xad gudba faqradaha (1,2,3,4,5,6) ee qodobkan iyo dhammaan go'aannada Hay'adda Tayo-dhawrka, waxaa lala tiigsanayaa Shuruucdadalka.

## QODOBKA 31aad
## DHAQAN-GELINTA HAL-BEEGYADA

1. Waxaawaajibkuahganacsatadainaydhowraanhal-beegyadaDalka

2. Marka la furayo warshad ama qeybo wax soo saar waa in ay markastaba halbeegooda ku saleysan yahay midka dalka udagsan.

# QAYBTA 4AAD
# CABIRRADA IYO BAAREYAASHA

## QODOBKA 32aad
## UJEEDADA CABIRRADA

1. Waxaa loola jeedaa cabbirka hab cilmi qiyaaseed lagu ogaado tilmaamaha dhirir, mug, cuf, iyo wixii lamid ah oo ay leedahay agabka.

2. In la helo cabbirro khaas ah, waxa ay muhiim u tahay horumarinta jaan-goynta loo baahan yahay in lagu jaangooyo badeecadaha noocyadooda kaladuwan.

3. In la dhiirri-geliyo cilmi baarista iyo horumarinta cabbiradda si loo kordhiyo fursadaha hay'aduhu ka heli karaan ama ka qaadankaraan is dhaafsiga farsamada iyagoo adeegsanayacabbiradaas.

## QODOBKA 33aad
## ADEEGSIGA CABIRRADA

Hay'adda tayo-dhawrka soomaaliyeed waxay ku soo-saaraysaa xeer-hoosaadkeeda diiwaanka cabiradda Qaranka oo faahfaahsan.

## QODOBKA 34aad
## MAGACAABIDDA IYO AWOODAHA BAAREYAASHA

1. Baareyaasha waa shaqaale ka tirsan hay'adda tayo-dhowrka waxaana magacaabayamaareeyaha.
2. **Qof kasta ama xubnaha loo magacaabayo baareyaasha waa inuu:**
    a) **Yahay Muwaadin Soomaaliah.**

    b) **Leeyahay aqoon iyo khibrad la xiriirtabaarista.**

    c) **Ku sifoobay akhlaaq iyodadnimo-wanaag.**

    d) **Ku sifoobay ammaano iyodhowrsanaan.**

3. Baaruhu wuxuu awood u leeyahay in uu hakin karo ama joojin karo agab kasta oo aan waafaqsanaynSharcigan.

4. Hay'adda tayo-dhawrka Soomaaliyeed waxay soo-saaraysaa Xeer-hoosaad lagu tilmaamayo awoodaha iyo hab-sami u socodka howlaha baarista iyobaareyaasha.

## QEYBTA 5AAD
## ASTAAMAHA IYO SHAHAADADATAYADA

### QODOBKA 35aad
### ASTAAMAHA HEERKA-TAYADA IYO SHAHAADADA

1. Hay'adda waxay leedahay astaan u gaar ah oo loo yaqaano astaanta tayada, waxaana isticmaalaya wax soo-saaraha, dhoofiyaha iyo soo-dhoofsadaha kaddib markii ay ogaato Hay'adda tayo-dhawrka in badeecada ay waafaqsan tahay hal-beegyada Dalka.

2. Hay'addu waxay bixineysaa shahaado tayo taasoo muujineysa in adeega ama badeecada ay waafaqsan tahay hal-beegyada gaarka u ah badeecadaas.

3. Hay'addu waxay caddeyneysaa shuruudaha iyo habka lagu qaadan karo astaanta iyo shahaadada tayada.

### QODOBKA 36aad
### GO'AANNADA TAYO DHOWRKA HAY'ADDA

Go'aannada Hay'adda ee ku salaysan baaritaan, waa kama dambeys aan racfaan laga qaadan karin waxayna ku lifaaqeysaa warbixinta sheybaarka.

### QODOBKA 37aad
### KHIDMADDAHAY'ADDA

Khidmadaha hay'adda ay ku qaadeyso adeegyada ay bixiso waxaa xeer ku saaraaya Wasiirka Wasaarada Ganacsiga iyo Warshadaha ka dib markuu latashado golaha maamulka iyomaareeyaha.

## QEYBTA 6AAD
## XIRIIRADA HAY'ADDA
## QODOBKA 38aad
### HABKA WADA-TASHIGA HAY'ADDA IYO GANACSATADA

Wada-tashiga Hay'adda iyo ganacsatada waa saldhigga wada-shaqeynta labada dhinac si loo gaaro himilada, hiigsiga, iyo in la helo tayo-dhawr lagu baahiyo dalka oo dhan, iyadoo laga wada shaqaynayo horumarinta, casriyeynta ganacsiga iyo wax-soo-saarkaDalka.

## QODOBKA 39aad
## ISKA HOR-IMAADKA DANAHA ISDIIDAN

Madaxda sare ee Hay'adda iyo Shaqaalahaba waxaa ka reebban qabashada howlo ka hor imaan kara hawlaha hay'adda ama carqaladeyn kara wax qabadkeeda.

## QEYBTA 7AAD
## QODOBBO GUUD
## QODOBKA 40aad
### KOR-MEERKA IYO KOR-JOOGTAYNTA

Hay'addu waxay si joogto ah u samaynaysaa kormeer ay ku hubinayso in lafuliyay Sharcigan iyo Xeer-nidaamінта ay hay'addu soo saartay.

## QODOBKA 41aad
## GANAAXA

Hay'addu waxay awood u leedahay in ay ganaaxdo ciddi ku xad gudubta sharcigan, haddiise uu jiro fal dambiyeed waxaa loo gudbinyaa hay'adaha ku shaqada leh.

## QODOBKA 42aad
## XIRIIRADA HAY'ADDA

Hay'addu waxay dhaqan-gelinaysaa Heshiisyada Caalami ama gobol oo ay Soomaaliya qeybta ka tahay, kuwaas oo la xariira arrimaha hal-beegyada iyo Tayo-dhawrka.

## QODOBKA 43aad
## FASIRAADDA SHARCIGA

Sharcigan wixii **aan** si cad loogu qeexin, waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Dastuurka Dalka iyo Sharciyada kale ee dhaqan-galka ah.

## QODOBKA 44aad
## BAABI'IN

Sharcigan wuxuu baabi'inayaa Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin.

## QODOBKA 45aad
## DHAQAN-GAL

Sharcigan waxaa uu dhaqan-gelayaa marka Madaxweynaha JFS uu saxiixo laguna soo-saaro faafinta Rasmiga ah.

**SHARCILR.28** Taariikh:19/05/2020

**ANSIXINTA SHARCIGA DUULISTA RAYIDKA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY**: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/258/B-10/20 Taariikh: 20/02/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Duulista Rayidka

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

***Waxa Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Duulista Rayidka

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO:19/05/2020**

MadaxweynahaJ.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/067/2020
TAARIIKH 30/6/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA DUULISTA RAYIDKA

**SharciLr.________ee________________**
**SHARCIGA DUULISTA RAYIDKA**

## HORDHAC

Iyadoo la raacayo Qodobka 7[aad] (1) ee Dastruurka KMG Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu soo saarey Sharciga Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed.

## Qodobka 1aad
## Ereybixin

Sharcigan, haddii aysan macnaha guud ahayn ama aan macnahiisa si gaar ah lagu xusin, erey bixintiisu waa sida soo socota:

1. **"Shil"** waxaa loola jeedaa: dhacdo kasta oo la xiriira carqalad deg deg ah oo ku timid hawlgalka diyaarad, taas oo dhacda inta u dhaxaysa wakhtiga qof kasta isu diyaarinayo duulimaad illaa wakhtiga qof kasta ka degayo diyaaradda, ama marka loo eego diyaarad aan cidi wadin, waxay arrintani dhacaysaa inta u dhaxaysa wakhtiga diyaaraddu diyaar u tahay inay duusho illaa inta laga gaarayo dhammaadka duulimaadka in si deg-deg ah matoorka diyaaradda loo damiyo ciladawgeed.
2. **"Shaqo Duulimaad"** macnaheedu wuxuu yahay: duulimaad diyaaradeed oo aan ahayn gaadiidkaganacsiga.
3. **"Gegi-diyaaradeed"** Waxaa loola jeedaa: goob kasta oo dhul ama biyo ah oo loogu talagalay in loo isticmaalo degista, duulista, iyo dhaqdhaqaaqa diyaaradaha; oo ay ku jiraan dhismo kasta oo lagu rakibay qalab lagu hago diyaaradaha, goob kasta ee loo isticmaalo gegidda iyomaaraynteeda.
4. **"Diyaarad"** waxaa loola jeedaa: aalad kasta oo ku duuli karta hawada, marka laga reebo hubka jawaab celinta hawada ka soo horjeeda ee dhulka dushiisa lagahago.
5. **"Wadada Hawada" (AIRWAY)** waxaa loola jeedaa: goob hawo oo loogu talo galay marin diyaaradeed ama qeyb ka mid ah, loona aasaasay qaab u eg marin hawada sare kuyaalla.

6. **“Adeegga Hagidda Diyaaradaha”waa:**
   a) Adeeg is-gaarsiineed, ha ahaato cir ama dhul, oo loogu talagalay bed-qabkadiyaaradda;
   b) Adeegyada hagidda gooshidda hawada, oo loo isticmaalayo raadiyayaasha, raadaaradda iyo qalab muuqaaleed (visual aids to navigation) oo si toos ah loogu hagodiyaaradda.
   c) Adeegyada gaadiidka hawada ee loogu talagalay bed-qabka diyaaradaha; iyo
   d) Adeegyada macluumaadkaduulista

7. **“Wadada Gaadiidka (AIR-ROUTE)”** waxaa loola jeedaa: khad aag xadidan oo hawo iyo dhulba leh oo loo aqoonsaday in ay lagama maarmaan u tahay fulinta xeerarka duulimaadka ee caalamiga ah.

8. **“Shirkadaha gaadiidka duulimaadyada”** waxaa ka mid ah shaqsiyaad, shirkado madax-bannaan, ama hay’adaha aan madax-bannaanayn, shirkadaha ururadda iskaashatooyinka iyo ururada rayidka ah oo ka hawl-gala adeegyada gaadiidka duulimaadyada ee dadwaynuhu kiraysto si waafaqsan sharciga, qaadana dadka, xamuulka amaboostooyinka.

9. **“Adeegyada Gaadiidka Hawada”** macnaheedu waa: adeeg kasta oo hawada ah oo ay sameyso diyaarad ganacsi oo lagu qaado rakaabka, boostada ama shixnadaha;

10. **“Hay’adda”** waxaa loola jeedaa: Hay’ad**d**a Duulimaadka Rayidka Soomaaliyeed ee lagu unkay qodobka 2aad eesharcigan

11. **“Shaqaale idman”** macnaheedu waa: shaqaale kasta oo maareeyuhu u idmaday inuu ku shaqeeyo awoodaha ama fuliyo waajibaadka shaqo marka loo eego sida loo sheegay in uu u adeegsado

12. **“Amniga Duulista”** waxaa loola jeedaa: tallaabooyin isugu jira mid dad iyo qalab oo loogu talagalay in duulimaadyada looga ilaaliyo faragelin sharci-darroah.

13. **“Guddiga”** macnaheedu waa: Guddiga Maamulka Hay’adda lagu abuuray qodobka 7aad eesharcigan;

14. **“Wasiirka”** waxaa loola jeedaa: Mas’uulka Wasaaradda qaabilsan arimaha la xiriira Gaadiidka Cirka iyoDuulista

15. **“Shixnad”** waxaa loola jeedaa: xammuul kasta oo lagu qaado diyaarad.

16. **“Shahaado”** waxaa loola jeedaa: habka loo go’aamiyo in qof ama urur uu leeyahay aqoon, karti, iyo xirfad muhiim u ah ama looga baahan yahay hawl-gal gaarah.

17. **“Kharashka”** waxaa loola jeedaa: lacagaha la qabtay ama la qaban doono oo loo adeegsaday xeerkan ama mid ka danbeeyay, ama ka soo baxay shaqo kasta oo ay qabatayhay’addu

18. **“Heshiiska Chicago”** waxaa loola jeedaa: Heshiiska lagu aasaasay Hay’adda Duulimaadka Rayidka Caalamiga ah ee (ICAO) oo ka dhacay Chicago **7**$^{dii}$Disembar 1944, iyo lifaaqyada iyo wax ka beddelkooda.

19. **“Gaadiidka Ganacsiga”** waxaa loola jeedaa: gaadiidka rakaabka ama hantida qaada oo lakiraysto.

20. **“Waddamada Ku Bahoobay”** waxaa loola jeedaa: Dawlad kasta oo ka mid ah Heshiiska Chicago;

21. **“Xakamayn-Ilaaalin (CONTROLLED)”** macnaheedu waa: goob hawadeeda la xakameeyay ama la ilaalinayo marka la kor marayo;

22. **“Shirarka Heshiis”** macnaheedu waa: shir/heshiis ama qawaaniin, iyo wixii lifaaqyo ah oo la xiriira duulimaadyada rayidka ah ee ay Soomaaliya saxiixday, ku biirtey ama qeyb ka tahay, haddii la dhammeeyay, la saxiixay ama la qaatay ka hor ama ka dib bilowgii xeerkan, oo ay ku jiraan HeshiiskaChicago;

23. **“Xubnaha Duulista”** waxaa loola jeedaa: qof kasta oo uu u xilsaaray milkiilaha diyaaradda inuu guto waajib inta lagu jiro duulimaadkadiyaaraddeed;

24. **“Maareeyaha Guud”** waxaa loola jeedaa: Maareeyaha Guud ee Hay'ada oo lagu magacaabay qodobka 14$^{aaad}$ faqradda1$^{aad}$.

25. **“Sanadka Maaliyadeed”** waxaa loola jeedaa: muddada labo iyo toban bilood ah oo ku eg dhammaadka soddonka Disembar sanad kasta;

26. **“Garoonka/gegida Dowladda”** waxaa loola jeedaa: garoon ama gegi ay Dowladdumaamusho.

27. **“Si Qaldan-u-isticmaal Macluumaad”** macnaheeda waxa loola jeedaa u-isticmaalidda macaluumaadka bed-qabka diyaaradaha ujeeddo ka duwan ujeeddadii marka hore loogu talagaleyururintiisa.

28. **“Dhacdo”** waxaa loola jeedaa: dhacdo aan aheyn shil oo la xiriirta hawlgalinta diyaarad oo saameeya ama saamayn kara amniga hawlgalkadiyaaradaha.

29. **“Duulimaadyada Ganacsiga Gudaha” iyo “Duulimaadyada Ganacsi Dibadda”** waxaa loola jeedaa: duulimaad diyaarad dad, hanti iyo boosto qaad**d**a si loo horumariyo ganacsiga iyo dalxiiska.

30. **“Gaadiidka Duulista ee Gobollada u kala goosha”**, **“Gaadiidka Duulista ee Dibadda”,** iyo **“Gaadiidka Duulista ee Shisheeye”** waxaa loola jeedaa gaadiidka duulista oo qaada rekaabka iyo boostada oo la kiraysto si loo horumariyo ganacsiga iyo dalxiiska, kaas oo isagagoosha:
    a) Meel kasta oo ka mid ah Soomaaliya iyo meel ka mid ah gobol kale ama waddan kale oo la isaga gudbo cirka (airspace).
    b) Meel ka mid ah Soomaaliya iyo meel kasta oo kabaxsan.

31. **“Diyaarad Soomaaliyeed”** waxaa loola jeedaa: Diyaarad ka diiwaangashanSoomaaliya;
32. **“Ruqsad”** Waa: shahaado kasta ama oggolaansho dukumiinti oo u oggolaanaya qof kasta inuu sameeyo wax waafaqsan Xeerkan;

33. **“Barnaamijka Amniga Qaranka ee Duulista Rayidka”** waxaa loola jeedaa: nidaam isku dhafan oo ku saabsan shuruucda iyo hawlaha ay soo bandhigtay, fulisayna Dawladdu, oo looga dan-leeyahay ilaalinta falalka sharci-darradda ah ee ku iman kara duulimaadyada rayidka ah.
34. **“Hawl-galiye”,** marka laga hadlayo diyaarad, waxaa loola jeedaa: qofka mas’uulka ka ah maareynta diyaaradda.
35. **“Milkiilaha”,** marka laga hadlayo diyaarad ama gegi, waxaa loola jeedaa: qof magaciisu ku diiwaan-gashan yahay ama ruqsad u haysta, iyo qof kasta oo wakiil uga ah Soomaaliya milkiile shisheeye.

36. **“Rakaab”** waxaa loola jeedaa; qof kasta oo diyaaradda saaran oo aan ahayn xubin ka mid shaqaalahadiyaaradda
37. **“Gegida diyaaradaha gaarka ah”** waxaa loola jeedaa: gegi kale oo aan hoos iman xukuumadda, hay’ad dowladeed, ciidan ama boliis.
38. **“Faafin”** waxaa loola jeedaa: daabacadaha soo socda oo la soo saarey, ka hor ama ka dib bilowga xeerkan, sida:

a) Ogaysiisyada dadka ku duuladiyaaradaha
b) Daabacaadda macluumaadka duulimaadkahawada
c) Ogeysiisyada farsama-yaqaannadda, injineeradda iyo milkiilayaasha diyaaradaha rayidkaah.
d) Daabacaadaha duulistarayidka;
e) Wareegtooyinka macluumaadka duulimaadkahawada
f) Buugaagta iyo awaamirta hagayaasha,iyo
g) Faafinta kale ee rasmiga ah ee loo soo saaray in ay awood siiso qodobbada xeerkan oo loo samayey in ay u hoggaan-samaan wakiilada sharcigan haysta, sida wakiiladda shixnadaha keena ama cid kasta oo ay u ogolaatay Hay’addu oo ku shaqeeya gaadiidka cirka, ama ilaaliya amniga, taas oo ay Hay’addu raali ka tahay.

39. **“Qofka ay khuseyso”** waxaa loola jeedaa: duuliya xilligaa ee diyaaradda, maamule ama milkiilaha diyaarada wakhtiga shil ama shil halis ah dhacayo ama goobta shilku ka dhacay oo ah meel kamid ah Soomaaliya iyo/ama haddii ay noqoto gegi ku dhaw Soomaaliya milkiilaha ama hawlgeliyagegidaas.
40. **“Gantaal”** waxaa loolaa jeedaa: aallad lagu rido hawada sare oo loogu talagalay in lagu saadaaliyo hawada oo ay gubtaan waxa calooshiisa ku jira, inta aan la ridinna miisanku u yahay wax ka badan 2.2kilograms.
41. **“Arrimaha bed-qabka”** waxaa loola jeedaa: sababaha keena shilalka diyaaradaha ama baaritaanka lagu ogaanayodhacdada.
42. **“Macluumaadka bed-qabka”** waxaa loola jeedaa, macluumaadka lasoo ururiyay iyo nidaamyada computer-ka ee loo abuuray hagaajinta ammaankaduulista.
43. **“Talo soojeedin Bed-qab”** waxaa loola jeedaa: soo jeedinta talo ka timid baaraha u xilsaaran baarista - oo ku saleysan xogta laga helay baadhitaan ama ilo kale, ujeedadeeduna tahay ka hortaga shilalka iyo dhacdooyinka, iyo in aysan jirin wax ujeedo ah in lagu eedeeyo ama masuuliyad shil amadhacdo

44. **"Qofka Xasaasiga u ah Bed-qabka"** waxaa loola jeedaa: qof halis gelin kara amniga duulista haddii qofkaasi uu u qabto shaqadiisa si aan habooneyn, kuwaa waxaa ka mid ah xubnaha farsamo yaqaanada, xubnaha duulista, shaqaalaha dayactirka diyaaradaha, xubna hagista diyaaradaha, iyo baarayaasha ammaanka;
45. **"Baaritaanka"** macnaheedu waa: codsiga farsamo ama hab kale oo loogu talagalay in lagu aqoonsado ama lagu ogaado hubka, waxyaabaha qarxa ama aalabaha kale ee khatarta ah, waxyaabo loo isticmaali karo in lagu galo ficil faragelin sharci darroah;
46. **"Barnaamijka Amniga"** waxaa loola jeedaa: tallaabooyin kasta iyo habraacyo lagu ilaaliyo amnigga iyo falalka looga hortagayo faragelinta sharci-darada ah ee duulimaadyada rayidka;
47. **"Dhacdo Halis ah"** macnaheedu waa: dhacdo ku lug leh diyaradaha, taasoo tilmaamaysa in ay dhici karto in uu jiro shil la xiriira howl-galka diyaaradeed oo dhaca, marka laga hadlayo diyaarad duuliye leh, inta u dhaxaysa marka koridda diyaaradda illaa iyo inta ay dhammaan dadku ka degayaan diyaarada, ama marka laga hadlayo diyaarad aan duuliye lahayn, waxay dhacaysaa inta u dhaxaysa wakhtiga diyaaradu diyaar u noqoto in ay dhaqaaqdo ilaa waqtiga dhamaadka duulista oo ay soo degto lana damiyomatoorka.
48. **"Diyaarad Dowladeed"** waxaa loola jeedaa: diyaaradaha loo isticmaalo adeegyada militari, canshuuraha iyo adeegyada booliiska ama wixii kale ee u diiwaan gashan si dowli ah, iyo fulinta hawl dawladeed.
49. **"Barnaamijka bed-qabka diyaaradaha Dalka"** waxaa loola jeedaa: nidaam ku saabsan sharciyada iyo wax-qabadyada ay soo bandhigtay fulisayna dawladda oo u jeedadeedu tahay tayaynta bed-qabka iyo kor u qaadiska bixinta adeegyada ugu haboon ee duulista.

## CUTUBKA 1AAD
## QAAB-DHISMEEDKA MAAMULKA HAY'ADA DUULISTA RAYIDKA SOOMAALIYEED

### Qodobka 2aad
### Aasaasida Hay'ada

1. Hay'adda Duulimaadka Rayidka Soomaaliyeed ayaa lagu aasaasay Sharcigan (wixii hadda ka dambaya waxa loogu yeeri doonaa **"Hay'adda"**).

2. Hay'addu:

   a. Waa Hay'ad dawli ah oo leh **shakhsiyad qaanuuni ah.**
   b. Waxay leedahay shaabad qalalan (commonseal)
   c. Waxay leedahay awood ay wax ku dacweeyso ama lagu dacweeyo magaceeda
   d. Waxay leedahay awood ay hantida maguuraanka ah iyo midda guurtada ah ku wareejiso ama kula soo wareegto, ku qaadato, ku iibsato, ama kuyeelato
   e. Waxay awood u leedahay inay hanti amaahato marka Wasiirka Wasaaradda, Wasiirka Maaliyadda iyo Gudigga Maamulkuansixiyaan
   f. Waxay geli kartaa qandaraas**, si waafaqsan Sharciga Iiibka ee Qaranka.**
   g. Waxay fulin kartaa dhammaan waxyaabaha ama falalka lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadka ku xusan Xeerkan, oo ay tahay inay si sharci ah u fuliyaan ama ay sameeyaan Hay'addahamadaxabannaan
   h. Hay'ada waxaa hogaaminaya Maareeyaha Guud, kaas oo uu soo jeedinayo Wasiirka Wasaaradda, waxaa ansaxinaya Golaha Wasiirada kadib waxaa magacaabi doono Madaxweynaha Jamhuuriyadda FederaalkaSoomaaliya.
   i. Hay'adda waxaa la xisaabtamaya Guddiga Maamulka, guddigaas oo leh awoodda uu sharcigani siiyey iyadoo la eegayo danta guud ee dalka.

## Qodobka 3aad
## Xarumaha Hay'adda

1. Xarunta dhexe ee Hay'addu waa inay ku taalo caasimadda dalka, **balse** Hay'addu waxay awood u leedahay inay ku shaqayso meel kasta oo dalka ka mid ah, si ay u ilaaliso danta guud ee dadweynaha.

## Qodobka 4aad
## Ujeedooyinka Hay'adda

1. Ujeedada Hay'adda loo aasaasay waa maamulka iyo maareynta duulimaadyada rayidka ah, garoomada iyo bed-qabka hawada Soomaaliya si waafaqsan qodobbada sharcigan, xeerarka caalamiga ah, kuwa heer-gobol iyo heshiisyada ay dawladda Soomaaliya saxiixday.

## Qodobka 5aad
## Waajibaadka Hay'adda

1. Hay'addu waxay dejinaysaa xeer-nidaamiyayaasha (regulations), qorshayaasha iyo istiraatijiyadaha soo socda, iyadoo la raacayo sharcigan.
    a) Hawl-galada duulista rayidka ee xuduudahaSoomaaliya;
    b) Hawl-galka Diyaaradaha Soomaaliyeed ee ka baxsan xuduudaha Soomaaliya.
    c) Faafinta habraacyada ku haboon bed-qabka duulista rayidka.
    d) Istiraatijiyadd lagu dhaqan galiyo habraacyada bed-qabka duulista rayidka.
    e) Ka caawinta Wasaarada gaadiidka dhulka iyo cirka dejinta siyaasada qaranka ee duulista iyo diyaarinta qorshe hawleed waafaqsan siyaasaddaqaranka.
    f) Isku-dubaridka qorshe lagu baaro laguna maareeyo maandooriyayaasha.

g) Bixinta shahaadooyinka, ruqsadaha, diiwan-gelinta iyo oggolaanshaha ay ku hawlgalaan shirkadaha iyoshakhsiyaadka ka shaqeeya duulistarayidka

h) Bixinta adeegyada hawomarista.

i) Aasaasida iyo joogtaynta nidaam lagu diiwaan geliyo laguna suntayo diyaaradaha rayidkaah;

j) Horumarinta duulimaadka rayidka ah eeSoomaaliya.

k) Talo siinta Xukuumadda Soomaaliya ee arrimaha ku saabsan duulimaadka Rayidka ah

2. HDRS waxaa kaloo waajibaadkeeda kamid ah iskudubaridka iyo hogaaminta, hawlaha baadi-goobka iyo samatabixinta shilalka diyaaradaha sida:

a. Fududaynta iyo gacansiinta hawl-wadeeenada baadhitaanka shilalkadiyaaradaha.
b. Sameynta baaritaan ku saabsan dhacdooyinka halis shil keeni kara.
c. Xeer-nidaaminta bed-qabka (safety), amniga, dhaqaalaha iyo farsamooyinka duullimaadyada rayidkaah;
d. Wax ka qabashada dhacdooyinka halis gelin kara amniga duulista;
e. Aasaasidda, iskuxirka iyo sugida barnaamijyada bedqabka iyo amniga duulista rayidka ah ee heer Qaran.
f. Ruqsad siinta shirkadahaDiyaaradaha;
g. Dhaqangelinta habraacyada farsamo (technical standards) ee loo ansixiyey diyaaradaha.
h. Ruqsad-siinta iyo kormeeerka hawl wadeenadaduulista.
i. Talo-bixinta farsamo ee naqshadeynta (design), rakibidda, iyo wax ka beddelka raadiyayaasha iyo agabka kale ee loo isticmaalo adeega gooshiddahawada;
j. Hubinta tayada qalabka, xarumaha iyo nidaamkaHay'adda.
k. Faafinta qodobadaXeerkan;
l. Soo saarida xog sax ah oo dhamaystiran wakhtigii loogu talagalay si loogu adeegsado qorsheynta iyo go'aan qaadashada la xiriirta gaadiidkacirka;
m. Kormeerka iyo dhawrista **qiimaha** adeegyada duulista, ilaalinta xuquuqda macaamiisha, deegaanka, iyo tartan ganacsi oo caddaalad ah;

n. Hirgelinta heshiiska Chicago (Chicago Convention) iyo heshiisyada kale ee caalamiga ah ee la xiriira duulimaadyada Rayidka ah, oo Soomaaliya ay qayb katahay;
o. Gacansiinta baaritaanada shilalka iyo iskuduba-ridka baadi-goobka iyo samata-bixinta shilalkadiyaaradaha.-
p. Samaynta cilmibaaris ku saabsan khataraha dhicikara ee la xiriira bed-qabka duulista iyo talaabooyin lagagahortegayo.
q. U kuurgelidda ganacsiga adeegyada duulista ee diyaaradaha imanaya ama ka dhoofaya Soomaaliya si loo kobciyo loona horumariyo gaadiidkacirka.
r. Ka caawinta Wasaaradda Arimaha Dibadda wada xaajoodyada caalamiga ah ee gaadiidka cirka iyo hirgelinta heshiisyadii lagaaray.
s. Samaynta barnaamijyo khaas ah oo ay Hay'addu ku fuliso habraacyada (standards) la xiriira hawl-fududeynta (facilitation), amniga duulista, ilaalinta degaanka, safrinta shixnad khatar ah iyo arin walba oo u baahan in caalamku si isku mid ah uqabto.
t. Kala shaqaynta Hay'adda ICAO hirgelinta siyaasaddaha iyo xeernidaamiyayaashaHay'adda.
u. Kormeerid dhamaystiran oo lagu samaynayo hawlgalada Hay'addaha duulista, iyadoo loo kuurgelayo saamaynta uu ku leeyihiin bedqabkaduulista.
v. Ku samaynta dib u eegis joogto ah bedqabka duulista rayidka ah, si loola socdo heerka bedqabka, loogana hortago khataraha dhici kara.
w. Samaynta qiimeyn joogto ah, si loola jaanqaado is-bedbedelada bedqabka eeaduunka.

## Qodobka 6aad
## Waajibaadyada Kale ee Hay'adda

1. Hay'addu waxay kaloo leedahay hawlaha la xiriira bed-qabka soo socda:
ku dhiirigelinta Hay'addaha duulista gudashada waajibkooda ku aadan bedqab habraaciisu (standard) sareeyo iyagoo adeegsanaya:

   a. Barnaamijyo tababar iyo aqoon kororsi dhamaystiran xaga bedqabka;

b. Talo bixin sax ah oo ku aadan bed-qaabka waqti walba;
c. Kor u qaadista wacyiga bahda duulista iyo muhimada ay u leedahay u hogaansanaanta xeernidaamiyayaashabedqabka.
d. Kor u qaadista wadatashiga iyo xiriirinta dhamaan qaybaha (parties) saameeynta ku leh bedqabka duulistarayidka

2. Iyadoo la tixraacayo xeernidaamiyayaasha waafaqsan qodobada sharcigan, Hay'addu waxay kaloo leedahay waajibaadyada soo socda:
   a. Meelmarinta sharcigan, shuruucda kale ee wadanka iyo xeer-nidaamiyeyaasha ku saabsan caymiska iyo heshiisyada maaliyadda ee DuulistaHawada,
   b. Hay'addu waxay sidoo kale bixinaysaa adeegyada hagida diyaaradaha mara hawada Soomaaliya iyo meel kasta oo ka baxsan xuduudaheeda oo Soomaaliya u xilsaaran tahay, iyada oo la raacayo is-fahan caalami ah oo lagu fulinayo adeega hawada, adeega digniinta (alert services) iyo isku duwidda raadinta iyo samatabixintadiyaaradaha.
   c. Fulinta heshiiska Chicago, casriyeynta lifaaqyadiisa (Chicago convention annexes amendments), iyo xeerarka kale ee Caalamiga ah oo Soomaaliya qayb katahay.
   d. Hay'addu waxay fulinaysaa heshiisyada bedqabka iyo hawo marista ee dhexmara Soomaaliya iyo wadamada kale ama Hay'addaha caalamigaah.
3. Hay'ada Duulista Rayidka (HDR) markay gudaneyso mas'uuliyadeeda bedqabka duulista iyo nabadgelyada waxay hawlaheeda la kaashanaysaa laamaha kale eedowladda.

## Qodobka 7aad
## Guddiga Maamulka (Board of Directors)

1. Guddigu waxay ka kooban yihiin (7) xubnood oo maareeyuhu ka mid yahay, **kuwaas oo labo ka mid ah ay yihiinhaween**.
   a. Labo xubnood waa inay haystaan shahaado jaamacadeed oo la xiriirta duulistahawada.
   b. Hal xubin waa inuu leeyahay takhasus jaamacadeed oo ah sharcigaduulista

c. Labo xubnood waa inay leeyihiin aqoon sare (Master's Degree) oo cilmiga dhaqaalaha **ama** xiriirka caalamiga ah (international relations).
d. Xubinta7[aad] waa inuu leeyahay aqoon jaamacadeed iyo waayo aragnimo maamul

2. Gudiga waxaa soo-jeedinaya Wasiirka isagoo raacaya nidaamka tartan furan oo cadaalad ku salaysan, **waxaa ansixinaya Golaha Wasiirada, waxaana magacaabaya Ra'iisul Wasaaraha,** waxayna iska dhex dooran doonaanguddoomiye.
3. Mudada gudigu xilka hayn karo waa afar (4) sano oo la cusboonaysiin karo hal mar ookeliya.

## Qodobka 8aad
## Shuruudaha Xubin-nimada Gudigga

1. Waa inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed oo aysan **maxakamadi dembi ku xukumin**;
Waa in uusan hayn xil ama shaqo ka hor imanysa (conflict of interest) hawsha loo igmaday.

## Qodobka 9aad
## Waayidda xubinnimada Guddiga

1. Waxaa lagu waayi karaa xubinimada guddiga sida soosocota:
   a. Geeri
   b. Iscasilaad
   c. Qabasho xil ka hor imanaya shaqada loo igmaday (conflict of interest)
   **d.** Dembi maxkamadi ku**xukuntay**
   e. Xil gudasho la'aan joogto ah oo ay xaqiijiyaan (2/3) xubnaha gudigu u soo jeediyaan WasaaradaGaadiidka
   f. Xil-gudasho la'aan caafimaad darosababtay
**2. Buuxinta xubintiibannaanaata:**
   a. Gudoomiyuhu waa inuu sida ugu dhaqsaha badan ku wargeliyaa WasaaradaGaadiidka.

b. Wasaaradda waa inay mudo saddex (3) billood gudeheed ah ku soo buuxisaa jagada banaanaatay iyadoo la raacayo sidaku xusan qodobka7[aad].
c. Xubinta cusub ee ku soo biirtay guddiga waxay xilka haynaysaa mudada u hartayguddiga.

3. Guddoomiyaha iyo xubnaha ka midka ah Guddiga maamulka waxay yeelanayaan gunooyin iyadoo lagu salaynayo nidaamka iyo shuruucda maaliyadeed eeHay'adda.

## Qodobka 10aad
## ShaqooyinkaGuddiga

1. Guddigu wuxuu mas'uul kayahay
   a. Dejinta siyaasadda guud eehay'adda;
   b. Korjoogtaynta iyo ilaalinta habsami u socodka shaqo ee Hay'adda
   c. Dejinta qorshe-hawleedka iyo horumarintahay'adda;
   d. Oggolaanshaha miisaaniyadda iyo xisaab-xirka miisaaniyad-sanadeedka; iyo
   e. Anshax-marinta iyo abaal-marinta hawl-wadeennada iyo shaqaalahahay'adda.

## Qodobka 11aad
## Awoodda Guddiga

1. Guddiga waa inuu si habsami leh u fuliyo hawlaha lagama maarmaan**ka** u ah korjoogtaynta si waafaqsan qodobada sharcigan:
   a. Soo-jeedinta waxkabedelka xeerarka la xiriira Duulista Rayidka Soomaaliyeed.
   b. Ansixinta xeer-nidaamiyayaasha ay soo jeediso Hay'addu oo waafaqsan heshiiska Chicago iyo heshiisyada kale ee caalamiga ah.
   c. Meelmarinta mashaariicda waaweyn (mega projects) sida dhismayaasha iyo qalabaynta xarumaha duulistarayidka.

# Qodobka 12aad
# Shirarka iyo Kulamada

1. **Guddigu wuxuu shirarkiisa iyo kulamadiisa u qabsanayaa sida soosocota:**
   a. Guddidu wuxuu qabanayaa kulamo joogto ah oo lagu qabanayo si waafaqsan qodobka saddexaad ee soosocda.
   b. Shirarka waxaa la qabanayaa waqtiyada iyo goobaha Guddigu go'aansado.
   c. Goluhu wuxuu kulmayaa ugu yaraan saddex jeer sannad-maaliyadeed (Financial year) walba, iyagoo kulmi doona afartii biloodbamar.
   d. Guddoomiyuhu wuxuu isugu wici karaa guddiga shir degdeg ah oo aan caadi ahayn.
   e. Waxaa la siinayaa 14 maalmood oo ogeysiis qoraal ah xubnaha gudiga marka la isugu yeerayo kulan caadi ah ama aan caadi ahayn, haddaanay aqlabiyadu isku raacin muddo ka duwan.
   f. Kulanka guddigu wuxuu ku qabsoomayaa saddex meelood labo meel marka ay joogaan tirada guud ee xubnahaguddiga.

2. **Maareynta Shirarka iyoKulamada:**
   a) Guddigu wuxuu shirarka iyo kulamada u maareynayaa sida soosocota
   b) Guddiga wuxuu u maareeynayaa kulamadooda siday isku afgartaan. Hadal-qoraalka shirarka (minutes of the meeting). Guddigu waa in uu hayaa ama xafidaa hadal-qoraalka shirarkooda
   c) Guddoomiyaha ayaa guddoominaya kulamada oodhan.
   d) Haddii uusan Guddoomiyahu joogin, xubnahawaxay **magacaabayaan**mid ka mid ah in uu shir gudoomiyo

3. **Cod-Bixinta**
   a) Cod-Bixinta Kulamada iwm. waxay u dhaceysaa sida soo socota:
   b) Guddigu wuxuu ku gaarayaa go'aamadiisa cod hal dheeri ah inta soo xaadirtaykulanka.

c) Shirgudoonka kulanka wuxuu leeyahay cod tixgalin ah, haddii ay is barbar dhacaan codadka xubnaha kale ee guddiga.
d) Marka laga hadlayo qodobka tobnaad (10), Xubnaha Guddida maamulka waxaa kamid ah MaareeyahaGuud
e) Goluhu wuxuu kaydinayaa hadal-qoraalka, xogta iyo go'aamada laga gaarayshirarkooda

## Qodobka 13aad
## Shaabada Guud eeHay'adda

1. Shaabadda guud ee Hay'adda waa in la xafido, waxaana lagu isticmaalayaa amarka Maareeyaha Guud **ee**HDR.

## Qodobka 14aad
## Maareeyaha Guud (MG)

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa Maareeye Guud, oo noqonaya mas'uulka ugu sareeya ee maamulaaya hawl-maalmeedka Hay'adda.
   a. MG waxaa ka reeban inuu leeyahay ama yeesho dan dhaqaale ama saami shirkad ganacsi oo ku lug leh duulimaadka rayidka.
   b. MG waxaa ka reeban inuu qabto shaqo kasta oo kabaxsan tan hay'adda oo la xiriirta DuulistaRayidka.
   c. MG waa inuu ka fogaado wax kasta oo dan gaar ah oo kahor imaanaya ama culays ku keeni karta Hay'adda iyoshaqaaleheeda markay fulinayaansharcigan.

## Qodobka 15aad
## Magacaabista MG

1. MG waxaa loo magacaabaya sida soosocotaa:
   a. Wasiirka Wasaaradda ayaa u soo jeedinaya Golaha Wasiirada magacaabista Mareeyaha Guud, ka dib marka ay ansixiyaan Golaha Wasiiraddu waxaa magacaabayaMadaxweynaha.
   b. Mudada xil-haynta MG waa 4 sano, taasoo uu Madaxweynuhu u cusboonaysiin karo hal mar oo kale (4 sano).

## Qodobka 16aad
## Shuruudaha MG

1. Shuruudaha MG looga baahanyay waa inuu yahay:
   a. Muwaadin Soomaaliyeed
   b. Qof leh khibrad aan ka yarayn 10 (toban) sano oo la xiriirta Duulista Hawada Soomaaliyeed.
   c. Qof leh khibrad Maamul iyo Maareeyn aan ka yarayn muddo 5 (shan) sanoah
   d. Qof leh ugu yaraan aqoon heerka darajada labaad ee jaamacada (Masters Degree) oo la xiriirta duulista hawada ama maamul iyomaareeynta.
2. Maareyaha Guud wuxuu xilka ku waayikaraa:
   a. Geeri ku timaada
   b. Xanuun sababay xil-gudasho la'aan oo dhakhtarcadeeyey
   c. Inuu is casilo ama uu hawl-gabnoqdo
   **d.** Inuu galay fal dambiyeed Maxkamadi ku**xukuntay**
   e. Inuu jebiyo dastuurka iyo shuruucda **kale ee** dalka uyaala.

## Qodobka 17aad
## Waajibaadka iyo Awoodaha MG

1. MG wuxuu masuul kayahay:
   a. hawl-fulinta lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadkiisa, si ay u suurta galaan ujeedooyinkaHay'adda
   b. Hirgelinta xeerarka ku xusan sharcigan iyo xeerka caalamiga ah ee Chicago (ChicagoConvention)
   c. Meel-marinta, kormeerida iyo horumarinta nidaamyada duulista hawada
   d. Kormeerida ama xayirista Diyaarad haddii la ogaado khatar dhab ah oo ku saabsan nabadgelyadda iyo bed-qabkaDuulista Hawada.
   e. Hir-gelinta siyaasadda duulista hawadaqaranka.
   f. **U** warbixinta Guddiga Maamulka (board of directors) howl maalmeedka shaqadaHay'adda

g. Fulinta iyo meel marinta awooddaha kala duwan ee Hay'adda
h. Gacan ku haynta iyo kormeerida shaqaalaha iyo dhaq-dhaqaaqa shaqo eeHay'adda.

2. MG isagoon jebinayn qodobada sharcigan waa inuu gutaa waajibaadka lagama maarmaanka ah ee soosocda:
   a. Sugida hab-sami u socodka DuulistaHawada
   b. Bixinta adeega hagidadiyaaradaha.
   c. Sugida iyo hubinta heerka farsamooyinka la isla ogolyahay ee diyaaradaha
   d. Howl-gelinta kaabayaasha dhaqaalaha ee Duulista Hawada
   e. Hubinta kartida iyo xirfada shaqaalaha DuulistaHawada.
   f. Hubinta hab-sami u socodka nidaamka, agabka iyoxafiisyadaHay'adda
   g. Soo saarista iyo keydinta xog dhameystiran oo ku saabsan Duulista Hawada si loogu adeegsado qorshaynta iyo go'aan qaadashada la xiriirta DuulistaRayidka.

3. MG wuxuu mararka qaar qoraal ahaan ugu wakiilanayaa awoodihiisa oo dhan ama qaar sida Sharcigan u ogol yahay mid ka mid ah Ku-xigeenada Maareeyaha Guud eeHDR.

## Qodobka 18aad
## Magacaabidda Ku-Xigeenada
## Maareeyaha Guud ee HDR

1. Ku-xigeenada Maareeyaha Guud ee HDR waxaa soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda Gadiidka Circa iyo Dhulka, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirada ka dib waxaa magacaabaya Ra'iisul Wasaraha JFS si loo hubiyo isu-dheeli tirka iyo habsami u socodka hawlaha, Hay'addu waxay yeelanaysaa saddex Ku/xigeen oo kala qaabilsan Xeer-nidaaminta (Regulatory body), garoomada (aerodromes) iyo bixinta adeega gooshidda hawada (Air Naviagation ServicesProvision)

2. Sharuudaha xulista iyo aqoonta waxay kala mid yahiin sharuudaha ku xiran MaareeyahaGuud.

# Qodobka 19aad
# Shaqaalaha Hay'adda

1. Hay'addu waxay dooranaysaa, shaqaalaysiinaysaa ama magacaabaysaa agaasimayaasha waaxyaha, saraakiisha, shaqaalaha, la taliyayaasha, sharci-yaqaanada iyo wakiilada Hay'adda, kuwaasoo lagama maarmaan u ah inay si habboon u fuliyaan hawlaha Hay'adda si waafaqsan Xeerkan iyada oo la raacayo habraacyada, shuruudaha iyo shaqooyinka looigmaday.

2. Guddig**a** Maamulku wuxuu, mararka qaarkood, dib u eegayaa mushaharaadka, gunooyinka, xaaladaha iyo heshiisyada ay ku adeegaan shaqalaaha HDR.

3. Shakhsi ka mid ah guddiga, ama sarkaal, shaqaale ama wakiil ka tirsan Hay'adda uma soo jiidi karto gudashada waajibkiisa shaqo wax denbi ama magdhow ah hadduu si daacad ah u gudanayey hawlaha Hay'adda sida ku xusan xeerkanHDR.

4. Qodobka kor ku xusan (l) kama saamaxayo Hay'adda magdhow kolka fulinta xeerkan iyo shuruucda kale ee wadanka keeno dhaawac shakhsi ama burbur hantiyeed taasoo ku timid dayacaad ama masuuliyad darro ay ku kaceen shaqaalaheeda ama wakiilladaHay'adda.

5. Marka shaqaale ama wakiil ka tirsan Hay'adda uu sameeyo anshax xumo taasoo waxyeelo gaarsiisa qof ama hanti, shakhsiga ama cida dhibta geysatey ayaa mas'uul ka ah dhibka dhacay loomana soo raaci karoHDR.

# Qodobka 20aad
# Xaddidaadda Dacwad Oogista

1. Fal ama dacwad sharci ah laguma bilaabi karo Hay'adda hadaan ogeysiis qoraal ah, oo ay ku jiraan qodobbada dacwada, iyo ujeedada laga rabo in loo bilaabo dacwada aan dhibanaha ama wakiilkiisu gaarsiin Maareeyaha Guud eeHay'adda.

2. Fal ama dacwad sharci ah lagama been sheegi karo, waana in la bilaaba dacwada inta udhaxeyso maalinta falku dhacay ilaa lix bilood gudaheed marka ay dhacday arinta laga dacwoonayo. Wixii ka danbeeyo lix bilood dacwad laguma soo oogi karo HDR.

3. Fal danbiyeed hadii ay ka gasho HDR loogana adkaado dacwad**d**a maxkamad ama garsoor madaxbanaan hortiis laguna xukumo magdhow, waxa ay ku bixinaysaa magdhowga mudo udhaxeysa maalin ilaa lixbilood.

## Qodobka 21aad
## Wareejin Hantidda Dowlada iyo Deynta

1. Laga bilaabo taariikhda sharcigani dhaqan galo waxa lagu warejiyey Hay'adda Duulista Rayidka dhammaan hantidii jirtey (guurto iyo ma-guurto) oo loo adeegsanayey bixinta adeegyada iyo gudashada waajibaadyadaHay'adda.
2. Xukuumaddu waxay ku soo saaraysaa faafinta rasmiga ah ee dawladda wixii loo soo wareejiyey Hay'adda, hanti kasta ama hantida Dawladda oo ay u muuqato in ay u tahay muhiim Hay'adda si loogu fuliyo shaqooyinkeeda si waafaqsan Xeerkan.
3. Dhammaan **dhibaatooyinka** ka dhasha, si waafaqsan sharciga, adeegyada Hay'adda loo aasaasay, HDR ayaa loo raacayaa iyadoon cid kale lasaarin.

## Qodobka 22aad
## La Wareegidda Hantida Hay'adda

1. Xukun ama amar maxkamadeed oo ka soo horjeeda Hay'adda lagulama wareegi karo hantidda maguurtada ah ee Hay'ada ama kuwa kale sida gawaarida, doonyaha, Diyaaradaha ama qalab ay diyaaraduhu ku shaqayaan, matoorada, ama qalabka xafiisyada IWM. Xoolaha lagu xukumay HDR, waa in maareeyaha guud ka bixiyo dakhligahay'adda;
2. Waxa**a** reeban in la qabsado ama awood sharci lagu haysto hantidama-guurtadaahiyohantiyahakaleeeHDRkuwaasoo

aann ku koobnayn laakiin ay ka mid yihiin maraakiibta, gawaarida, diyaaradaha ama qalabada kale, matoorada.

## Qodobka 23aad
## Hab-sharciyeedka Xog-gaarsiinta Maareeyaha

1. Wargelin, u yeeris, soo qabasho, ama dukumiintiyada kale ee looga baahan yahay ama lagu ogolaaday Xeerkan, waxaa lagu gaarsiin karaa Hay'adda amaMG-
   a. In gacanta loo geliyo dokumentiga Maareeyaha Guud ama shaqaale kasta oo uidman,
   b. In la dhigo xafiiska Maareeyaha Guud;ama
   c. In lagu diro qaab elektroonik ah (Email) ama boosto la diiwaan geliyey laguna socodsiiyo MaareeyahaGuud.

## Qodobka 24aad
## Awooda iyo Mas'uuliyadaha Wasiirka Wasaarada

1. Wasaaradu waxay awood u leedahay ayadoo la tashanaysa Guddiga Maamulka Hay'adda iyo Maareeyaha Guud in uu go'aamiso hab-raaca siyaasadeed ee ay Hay'addu ku shaqayso, marka la eego ujeedooyinka iyo baahida loo qabo in la ilaaliyo madax-bannaanida hay'adda, Wasaaraduwaxay:-
   a. Tusmo guud siinaysaa guddiga maamulka taasoo ku saabsan hawlahaHDR;
   b. Ansixineysaa isbeddelka canshuuraha, sicirka, khidmadaha iyo kharashyada laga qaado adeegyada ay bixisoHay'addu;
   c. Lasoconeysaa mashaariicda waaweyn (Mega projects) ee ay hay'adda fulinayso kadib marka ay isku raacaan Gudiga Maamulku
   d. Mar mar, si guud ama si gaar ah qoraal ugu wakiilan kartaa Maareeyaha Guud ee HDR awoodeeda sharcigu siiyey oo aysan ku jirin kuwa halkan lagusheegay.
2. Maareeyaha Guud wuxuu Awoodaha loo wakiishay u fulin karaa, sida ku qeexan qodobada qaybaha (l) (d) sida sharciguqabo,

iyadoon loo eegin wakaaladda Wasaarada iyo shuruudaha ay ku xirtay.

3. Wakiilasho kasta oo hoos timaada xeerkan dib ayaa looga noqon karaa wakiilashaduna Kama qaadayso Wasaarada awoodaha sharcigu siiyey.

4. Wakiilasho kasta oo hoos imanaysa qodobkan way shaqaynaysaa, ilaa lagala noqdo xataa haddii ay dhamaatomudaddu.

## Qodobka 25aad
## Waajibaadka Caalamiga ah

1. Wasiirku wuxuu mas'uul kayahay;
    a. Lasocoshada siyaasadaha guud ee duulimaadyada rayidka
    b. Aasaasida hab lagu ururiyo dhacdooyinka shil keeni karasi loo ogaado dulduleedadabed-qabka.
    c. Baaritaanada shilalka heer qaran sida ku cad cutubka 12aad ee Xeerkan.

## Qodobka 26aad
## Kormeerka iyo QiimeyntaHDR

1. Wasaaradu waxay kormeeraysaa HDR ayada oo qiimeynaysa heerka waxqabad ee Hay'addu inuu gaarsiisan yahay heerka caalamiga ah (internationalstandards)
2. Wasiirku wuxuu magacaabi karaa hanti dhowr si loo fuliyo qiimeynta ku xusan faqrada (l) eeqodobkan.
3. Kormeerayaasha hantidhawrka lagu magacaabay faqrada (2) ee qodobkan waxay awood u leeyihiin inay arkaan dhamaan diiwaanada iyo xogaha la xiriira HDR iyo sharaxaad kasta oo looga baahan yahay gudashadaxilkooda.
4. Wasiirka oo raacaya talada kormeerayaasha hantidhowrka wuxuu soo jeedinayaa talaabo kasta oo haboon si loo saxo dulduleeda maalmulka maaliyada iyo kuwa bedqabka.

5. Hanti- dhowrka Guud ee Qaranku wuxuu xaq u leeyayahy in uu baaritaan ku sameeyo HDR sida hay'adaha kale, waxa**a** uu joojin karaa hanti-dhowrka uu magacaabayWasiirka.

## Qodobka 27aad
## Xeerarka Maaliyadda (Financial Provisions)

1. HDR waxay yeelanysaa dakhli iyo miisaniyad u gooni ah. Ilaha dhaqaale ee HDR waxay ka koobanyihiin:
   a. Khidmadaha ay ka qaado adeegyada ay ka mid yihiin bixinta, ansixinta iyo cusboonaysiinta shahaadooyinka, leysamada, ruqsadaha iyo dhamaan dukumentiyada kale ee ay HDR bixiso.
   b. Khidmadaha laga ururiyo Hay'addaha ay HDR xeer-nidaamiso sida garoomada diyaardaha, xarumaha gooshidda hawada, shirkadaha diyaaradahaIWM.
   c. Deeqaha iyo deymaha kayimaada;
   d. dawladda.
   e. Deeqaha iyo deymaha lagahelo
   f. ururada, shakhsiyaadkaiyo
   g. shirkadaha ganacsiga.
   h. Macaashka laga helo kaydkalacagaha
   i. HDR
   j. Lacagaha ka soo xeroodailaha
   k. dhaqaale een tooska ahayn (e.g.royalties)
   l. Khidmadda Bed-qabka ee rakaabka iyoxamuulka:

2. HDR waxay furanaysaa kuna shaqaynaysaa akoono bangi (lacag qalaad iyo Shilin Soomaali) kuwaasoo ay ansixiyeen Guddiga Maamulka (board ofdirectors).

3. HDR waxay lacagaha aanay degdega ugu baahnayn waxay ku maalgashan kartaa mashaariic ganacsi oo Gudiga maamulku (board of directors) ansixiyey.

4. Dawladu waxay HDR siinaysaa miisaaniyad ay ku shaqayso iyo maalgelin mashaariicda waaweyn ee looga baahan yahay hawl-gudashada HDR.

5. HDR waxay furanaysaa sanduuq kayd (Aviation Trust Fund) oo lagu shubo dhamaadka sanad walba lacag macquulah

6. HDR waxay u isticmaalaysaa lacagaha la dhigay sanduuqa kaydka arrimaha soosocda:
   a. Fulinta mashaariicda waaweyn sida dhismayaasha iyo iibsiga qalabka casrigaah
   b. Mashaariicda khaaska ah ee aae aan soo noqnoqon (non-recurring projects);
   c. Mashaariicda wacyigelinta iyo tababarka macaamiishaHDR.
   d. Xog ururinta iyo wada-xaajoodka xeer-nidaamiyayaasha;ama
   e. Cilmibaarista iyo horumarinta (reseach anddevelopment)

7. HDR oo la tashanaysa Hay'addaha adeega bixiya sida garoomada diyaaradaha, shirkadaha diyaaradaha waxay miisaaniyad u qoondaynaysa tababarda (TrainingFund).

8. Ilaha dhaqaalaha tababarada waxaa ka midah:
   a. Kharashka ay bixiyaan Hay'addaha ay HDRxeer-nidaamiso.
   b. QoondadaHDR;
   c. Deeqaha iyo deymaha laga helo ilokale

9. Habka loo ururinayo loona maamulayo kharashka tababarka waxaa qeexaya xeer-nidaamiyayaashaHDR.

10. HDR waxay u gudanaysaa waajibaadkeeda si waafaqsan nidaamka maaliyada iyadoo si macquul ah kharashka Hay'adda looga bixinayodakhligeeda.

11. HDR marka Guddiga Maamulka ay ogolaadaan waxay:
    a. Saami (shares) ka iibsanaysaa shirkadahaganacsiga;
    b. Samaynaysaa shirkado ganacsi oo hoos yimaadaHay'adda.
    c. Wadaag ganacsi la geleysaa shirkadaha aan ujeedadoodu ka hor imanayn danaha HDR looaasaasay.

12. Marka ay ka dhiman tahay saddex (3) bilood dhamaadka sanad maaliyayeedka (financial year) ayaa Guddiga Maamulku (board of director) bilaabayaa diyaarinta miisaaniyada sanadka soo socda.

13. Madaxyada sanad-maaliyayeedka (budget lines) waxaa ka mid noqonaya:

a. Bixinta mushaharooyinka, gunooyinka iyo kharashyada kale ee shaqaalaha HDR iyo Guddiga Maamulka (board of directors).
b. Bixinta xuquuqda hawlgabka eeHDR.
c. Dayactirka dhismayaasha iyo dhulalkaHDR.
d. Dayactirka iyo bedelka, qalabka iyo hantida guurtada ah ee HDR adeegsato.
e. Abuurista sanduuq kayd si waafaqsan faqrada 1.17.2 ee xeerkan, si loo bixiyo kharashyada mustaqbalka ee dhacdooyinka lama filaanka ah, caymiska, lacagaha hawlgabka, dhismayaasha, cusboonaysiinta qalabka iyo kharashyada kale ee HDR kuwaasoo Guddiga Maamulku (board of directors) u arko lamahuraan.
f. Lacagaha loo qoondeeyo adeegyada gooshidda hawada iyo tababaradashaqaalaha

14. HDRS, ka dib marka ay Guddigeeda Maamulku (Board of Directors) ansaxiyaan waxay miisaaniyada sanadlaha ah u gudbinaysaa Wasaaradda Maaliyadda si la mid ah hay'addaha kale eedowlada.
15. HDR ma geli karto kharash ka badan miisaaniyada lagu ansixiyey faqrada (3) ee qodobkan hadaanay ogolaansho ka helin golaha wasiirada.
16. HDR waxay diyaarinaysaa qorshe hawleed (Business Plan) afar sanadood ah kaasoo dib u eegis lagu samayo sanadwalba;
17. Qorshe hawleedka HDR waxaa ku jira himilooyinka dhaqaale (financial targets) iyo halbeegyada hawl fulinta (performance indicators).
18. Marka la diyaarinayo qorshe-hawleedka waxay HDR tixgelinaysaa:
    a. Heerka (standards) bed-qabka (safety) duulistarayidka.
    b. Ujeedooyinka iyo siyaasadadawladda;
    c. Kharashaadka loo qoondeeyey (funds)HDR;
    d. Hantida ay leedahay HDR iyo deymaha lagu leeyahay (assets and liabilities).
19. Qorshe hawleedka iyo in dib u eegista lagu samayo waxa la diyaarinayaa lix (6) bilood ka hor intaanu bilaaban sanad maaliyayeedku.
20. HDR waxay leedahay awooda deyn qaadasho (Borrowing Power):

a. waxay amaahanaysaa haddii loo baahdo lacag deyn ah ama hanti kale ka dib marka uu u ansixiyo wasiirka maaliyadda oo tixraacaya soo jeedinta Guddiga Maamulka.
b. Si waafaqsan mabaadi'da maamul-wanaagga ee hantida dadweynaha kuwaasoo lagu qeexay dastuurka dalka iyo xeerarka kale ee lagu maamulo hantida qaranka Soomaaliya, waxay HDR qaadan kartaa deyn calami ah.
c. Deymaha ay qaadato HDR waxa laga bixinaayaa dakhliga Hay'adda.

21. HDR ma qaadan karto amaah lacageed mana rahman karto hantideeda ma guurtada ah si ka baxsan waxyaabaha lagu qeexay xeerkan.

22. Sanad-maaliyayeedka HDR waa labo iyo toban (12) bilood oo waafaqsan sanad-maaliyadeedka dawaladda(JFS).

23. Guddiga Maamulku (Board of Directors) waxay xaqiijinayaan inay HDR dhaqangeliso buugaga Xisaabaadka ee Dakhliga, Kharashka, Deymaha iyo Hantiyaha kale si waafaqsan Xeer-Xisaabaadka Ganacsi (commercial accountingstandards).

24. Saddex bilood gudahood ka dib marka uu dhamaado sanad-maaliyayeedku, waxay Guddiga Maamulku (board of diretors) u gudbinayaan Hanti-dhawrka Guud ama hanti-dhawre lagu magcaabay faqrada (3) ee qodobkan, xisaabaadka HDR oo lagu lifaaqay:
    a) Cadayn-xisaabeed (statement) ay ka muuqato dakhliga iyo kharashka sanadkii dhamaaday;iyo
    b) Cadayn-xisaabeed (statement) ay ka muuqato hantida iyo deymaha HDR maalintii ugu dambeysey ee miisaaniyad-sanadeedka (financialyear).

25. Xisaabaadka HDR waxa hanti-dhowr (audit) ku samaynaya Hanti-Dhowraha Guud ama Hanti-dhowr uu magcaabay Guddiga-Maamulka (board ofdirectors).

26. Guddiga Maamulku (Board of Directors) shaqada kama qaadi karaan Hanti-Dhowr la magacaabay hadaanay helin qoraal uu ku aqbalay Hanti-DhowrkaGuud.

27. Hanti-Dhowraha Guud wuxuu Wasaarada u gudbin karaa warbixin khaas ah markii loo baahdo oo taabanaysa qaybaha xiriirka la lehshaqadiisa.
28. Hanti-Dhowruhu guud wuxuu u gudbinayaa warbixintiisa Baarlamaanka FederaalkaSoomaaliya
29. Hanti-dhowr (internal audit) aan ahayn Shaqaale Dawladeed waxaa khidmadiisa bixinayaHDR.
30. Hanti-Dhowraha Guud wuxuu saddex bilood gudahood ku soo diyaarinayawarbixinta HDR ee Sanad-Maaliyadeedkii tegey, asagoo u gudbinaya Wasaarada una sii marinaya Guddiga Maamulka.

## CUTUBKA 2AAD
## WAAJIBAADKA IYO XUQUUQAHA HDR
### Qodobka 28aad
### Xeerarka Nabadgelyada HDR

1. Si waafaqsan heshiisyada caalamiga ah iyo lifaaqyadooda HDR waxay abuureysaa waax ama agaasin qaabilsan nabadgelyada heer qaran ee duulimaadyada rayidka ah (National Civil Aviation Security programme -NCASP)
2. HDR waxay samayneysaa xeernidaamiyayaal (regulations) iyo habmaamuleedyo (procedures) lagaga hortegayo faldembiyeedyada iyadoo lala kaashanayo agaasinka nabadgelyada (NCASP)
3. HDR waxay samaynaysaa gudiga amniga ee HDR (Aviation Security Committee), kaasoo uu waajibaadkiisu yahay dhanka amniga, dhamaan shaqooyinka iyo agabyada la xiriira duulista rayidka.
4. HDR waxay xiriirinaysaa agaasinka nabadgelyada duulista rayidka iyo hayadaha amniga dalka hadii loo baahdo.
5. HDR waxay isku xireysaa arimaha sugida amaanka ee garoomada rayidku isticmaalo, rakaabka, duuliyayaasha, shaqaalaha garoomada, dadweynaha, iyo qalabka hagida diyaaradaha.
6. HDR waxay kormeereysaa xil-gudashada shaqaalaha nabadgelyada duulista rayidka sida baaristarakaabka,

boorsooyinka iyo xamuulka kahor inta aanay gaarin meelaha xasaasiga ah (restricted area).

## Qodobka 29aad
## Tayada iyo Tababarada Shaqaalaha Nabadgelyada Duulista Rayidka ah ee HeerQaran

1. HDR waxay siinaysaa tababar tayo leh hawlwadeenada amaanka duulista rayidka ah, ka hor intaanay shaqo ka bilaabin xarumaha hay'adda si waafaqsan lifaaqa 17[aad] ee heshiiska Chicago (Annex 17).
2. HDR ayaa mas'uul ka ah fulinta qorshaha heer qaran ee nabadgelyada duulista rayidka ah, waxayna meelmarinaysaa tababarada dhamaan shaqaalahanabadgelyada.

## Qodobka 30aad
## Shirkadaha Diyaaradaha iyo Garoomada

1. Garoon walba oo diyaaradeed wuxuuu dejinayaa kuna dhaqmayaa qorshe nabadgelyo oo qoran kaasoo laga ansixiyey HDR.
2. Shirkadaha diyaaradaha ee ka hawlgala garoomada Soomaaliya waxa ku waajibay inay layimaadaan ayna dhaqangeliyaan qorshe nabadgelyo oo waafaqsan shuruucda sugida amaanka duulista rayidka eeHDR.
3. Shirkadaha diyaaraduha ee lagu xusay farqada (2) waa inay u gudbiyaan HDR iyo garoonka ay ka hawl galaan nuqul qoraal ah oo muujinaya barnaamijka ay ku sugayaan amaanka hawlaha ay qabtaan.
4. Dhamaan shirkadaha bixiya adeegyada la xiriira duulista rayidka waa inay u hogaan samaan xeerarka sugida amaanka eeHDR.

## Qodobka 31aad
## Bed-qabka iyo Maamul-wanaagga

1. HDR waxay si waafaqsan lifaaqa 19aad (annex 19) ee ICAO dhaqan gelinaysaa nidaam lagu maamulo bedqabka (safety managementsystem)iyotayada(QMS)dhamaanshirkadahaka

ganacsada adeegyada duulista rayidka ah sida Garoomada, diyaaradaha IWM.

2. HDR waxay isku dubaridaysaa barnaamijka badqabka duulista rayidka ah oo saddex (3) sanadle ah kaasoo dib u eegis lagu sameeynayo sanadwalba.

## Qodobka 32aad
## Hawl Fududayn(Facilitation)

1. HDR iyadoo la kaashanaysa laamaha kale ee dawlada waxay hirgelinaysaa barnaamij Hawl Fududaynta Gaadiidka Hawada ee Qaranka (National Air Transport Facilitation Programme) oo sahlaya hawlaha gaadiidka cirka sida ambabaxa diyaaradaha, rakaabka, boorsooyinka iyo xamuulka si waafaqsan heshiisyada caalamiga ah.
2. HDR waxay isku dubarideysaa gudi heer qaran oo ka tala bixinaya kana qayb qaadanaya sahlida iyo fududaynta adeegyada duulista rayidka.
3. Garoomada caalamiga ah ee Soomaaliya waxay yeelanayaan barnaamij howl fududayn oo sahlaya dhaqdhaqaaqa rakaabka kahor inta aanay fuulin diyaaradaha(Facilitaion).
4. Gudiga heer qaran ee fududaya safarada gaadiidka cirka (National Air Transport Facilitation Committee) waxay ka koobnaan doonaan: Wasaaradaha Beeraha, Nabadgelyada, Dalxiiska, Gaadiidka, Arimaha Dibedda, Maamulka Garoomada, saraakiisha socdaalka, hawl wadeenada caafimaadka, shirkadaha ka shaqaysta gaadiidka cirka iyo sahaysiintooda iyo saraakiisha la dagaalankamukhaadaraadka.
5. Garoomada caalamiga ah ee Soomaaliya waxay yeelan doonaan gudi ka shaqaya fududaynta safarada gaadiidka cirka.
6. Garoon walba oo caalami ah wuxuu yeelan doonaa guddi hawl-fududayntu oo ka kooban doonaan wakiilada lagu xusay faqradda labaad (1) eeqodobkan.

## Qodobka 33aad
## Awoodaha Xil-gudasho iyo Kormeerka HDR

1. Sharcigani wuxuu kormeerayaasha iyo baarayaasha HDR u ogolaanayaa awood fulineed oo ay la kaashan karaan Saraakiisha Cadaalada, Amniga, arimaha la xiriira baaritaanada ama/iyo ku xadgudubka qodobada sharcigan ama xeer-nidaamyayaasha iyo go'aanada kale ee laxiriira.
2. Si loo xaqiijiyo in bed-qabka iyo nabadgelyada hawlaha duulista rayidka ah loo guto si waafaqsan xeerkan, fulinta xeer-nidaamiyayaasha iyo lifaaqyada ICAO, waxaa baarayaasha HDR la siiyey awood sharci fulineed oo ay kugelayaan:
3. Diyaarad rayid ah oo ka dhex shaqysa Soomaaliya meelkasta oo ayjoogto.
4. Diyaarad rayid oo ka diiwaan gashan Soomaaliya meelkasta oo ay ka joogtodunida.
5. Meel kasta iyo mar-walba si ay baaritaan iyo tijaabo ugu samayaan shirkadaha diyaaradaha, garoomada diyaaradaha, xarumaha diyaaradaha laga hago, dugsiyada lagu tababaro hawl-wadeenada duulista rayidka, goobaha dayactirka diyaaradah iyo shirkadaha adeega siiya duulista raiyidkaah.
6. Baarayaasha HDR waxay xaq u leeyihiin, iyagoo aan dib u dhac cudur daar la'aan ah samaynin,inay:
    a. Diyaarad ka joojiyaan duulimaad ka dib markay baaraan kuna helaan fal danbiyeed cad.
    b. Gacanta loo geliyo dukuminti shaqadooda la xiriira
    c. Baaraandiyaarad
7. Saraakiisha booliska, Caafimaadka iyo Beeraha iyagoo kaashanaya HDR waxay baaritaan ku samayn karaan diyaarad, qof, borsooyin iyo xamuul si waafaqsan shuruucda u degan wadanka iyo xeer-nidaamiyayaasha duulista rayidkaah.

## Qodobka 34aad
## Awoodda Joojinta Duulimaadyada

1. HDR waxay awood u leedahay inay shirkad ama duuliye ka joojiso isticmaalka diyaarad rayid marka laga helo ciladaha soo socda.
   a. Diyaarada oon farsamo ahaan duulikarin (not airworthy).
   b. Duuliyaha oon awoodin duulimaad sabab caafimaad amamid caqli awgeed.
   c. Waxyeelo qofeed ama burbur hantiyeed oo ka iman kara hawlgalka.
   d. Duuliyaha ama shirkada diyaarada iska leh oo denbi ama xadgudub xeerkan ka dhan ahgeysatey.
   e. Diyaarada oo laga bixin waayey deyn ay urahmanayd.
   f. Maamul Garoon ama wakiil sharci ah wuxuu xaq u leeyahay inuu daahiyo diyaarad duuli lahayd ilaa waqtiga ilaa ay:
   g. Shirkadda diyaaradda ku shaqysata ay ka bixiso khidmadaha garoonka iyo kharashyada adeegyada looga fidiyey Garoonka, ama
   h. Shirkadda diyaaradda ku shaqysata laga helo damaanad dhamaystiran oo ay aqbaleen saraakiisha garoomadu in lacagtaas la bixinayo.

2. Xaaladaha deg degga ah, HDR iyadoo kaashanaysa laamaha kale ee dawlada, waxay duulista rayidka ku soo rogi kartaa xaalad degdeg ah marka ay lagama-maarmaan u noqoto danta guud iyo bedqabka duulimaadyada rayidka ah. (Tusaale: FAA-9/11).
   a. HDR uma baahna in ay cid ka sugto jawaab la xiriirta dhaqan gelinta xaaladaha degdega ah ee bedqabka duulimaadka rayidka umana baahna ogolaansho maxkamadeed. Waxa ay Maxkamada bilaabeysa kadib marka ay amarka soorogto.
   b. Markay ku haboonaato, HDR waxay joojinaysaa ama waxka bedelaysaa xaaladda degdegah.

3. HDR waxay saamaxaysaa waajibaadyo lagu qeexay xeernidaamiyayaasheeda Hay'adda hadii danta dadweynuhu ku jirto.

a. HDR waxay soo saaraysaa dikareeto lagu joojinayo ama lagu dheqan gelinayo waajibaadyada lasaamaxay.
b. HDR waxay arimaha la joojiyey dhamaantood ku daabacaysaa faafinta rasmiga ah (Aeronautical Information Publications - AIP)SOMALIA.

4. Kala Saarida Awoodaha Shaqo ee HDR; Maamulka hawlaha duulimaadyada rayidka ah waxaa qabanaya HDR iyadoo kaashanyasa waaxyo shaqadoodu kala madax banaan yihiin sida hoos kucad:

   a. Waaxda dejinta xeer-nidaamiyayaasha (Regulatory functions) iyo kormeerka hawlaha bedqabka (Safety oversight functions) dulimaadyada rayidkaah.
   b. Waaxyaha bixiya adeegyada duulimaadyada rayidka ah, sida Garoomada, adeega hawo marista, dugsiyada tababara xirfadlayaasha duulista rayidka ah,IWM.
   c. Qaybihii kale ee loobaahdo.

## CUTUBKA3AAD
## DIIWAAN-GELINTA IYO HAYBSOOCA/SUMADA (NATIONALITY) DIYAARADAHA
## Qodobka 35aad
## Diiwaanka Qaranka Ee Diyaaradaha

1. HDR waxay diiwaan-gelinaysaa diyaaradaha rayidka ah marka ay buuxiyaan shuruudaha laga doonayo si waafaqsan lifaaqa 7aad ee heshiiska Chicago (ICAO ANNEX 7 to Chicago concention) iyo xeer-nidaamiyayaasha Hay'adda.

## Qodobka 36aad
## Shuruudaha Diiwaan-gelinta iyo Lahaanshahadiyaaradaha

1. Waxaa reeban in Soomaaliya lagaga dhex shaqaysto ama hawadeeda lagu duuliyo diyaarad aan la diiwaan gelin. Waxa dhici karta in diyaarad aan diiwaan-gashanayn ay HDR si waafaqsan xeer-nidaamiyeyaasheeda (regulations) siiso

ogolaansho ay ku duusho muddo yar oo lala kala wareegayo lahaan-shaheeda.

2. HDR waxay diiwaan gelinaysaa diyaarad kasta oo laga helo shuruudaha hoos kuqoran.
   a. Diyaara**d**da waxaa iska leh muwaadin Soomaaliyeed ama ajnabi degenaansho joogta ah laga siiyeey Soomaaliya si waafaqsansharciga.
   b. Diyaarada waxaa iska leh shirkad si sharci ah uga shaqaysata Soomaaliya, marka diyaaradu degan tahay laguna isticmaalaa wadankagudihiisa.
   c. Diyaaradu kama diiwaan gashana wadan kale;ama
   d. Diyaarada waxaa iska leh dawlada Soomaaliya(FGS)
3. Markuu codsado milkiilaha diyaaradu diiwaangelin, HDR way diiwaan-gelinaysaa ka dibna waxay siinaysaa milkiilaha shahaadada diiwaan gelintadiyaaradda.
4. Shahaadada diiwaangelinta waxaa lagu codsanayaa foomam ay ku qoran yihiin xog dhamastiran oo waafaqsan shuruucda Duulista Hawada
5. HDR waxay kala noqonaysaa ama joojinayaa shahaadada diiwaan-gelinta marka milkiiluhu buuxin waayo shuruudihii shahaadada lagu bixiyey.
6. HDR waxay kala noqonayaa ama joojinayaa diiwaan gelinta diyaarad walba oo loo isticmaalay ku xadgudubka shuruucda Soomaaliya.
7. Shahaadadada diiwaan-gelintu » waxay cadaynaysaa hayb sooca diyaarada si waafaqsan xeerarka caalamiga ah, laakiin cadayn uma aha cid**d**a iska lehdiyaarada.
8. Shirkada ama shakhsiga ku shaqaysta diyaarad waa inuu tusaa shahaadada diiwaan gelinta marka ay u baahdaan saraakiisha dawladaSoomaaliya.

## Qodobka 37aad
## Diiwaan-gelinta Matoorada, Marawxadaha iyo Qalabka Kale ee Diyaaradaha

1. HDR waxay aasaasaysaa nidaam lagu diiwaan-gelinayo matoorada, marawaxadaha iyo qalabka kale ee diyaaraduhu ku shaqayaan iyadoo ujeedadu tahay haybsooca qalabka iyo ilaalinta bedqabka duulista rayidka ah oo keliya.

## Qodobka 38aad
## Diiwaan-Gelinta Lahaanshaha Diyaaradaha

1. HDR waxay diiwaan gelinaysaa nidaam lagula socdo lahaanshaha iyo lakala wareegida diyaaradaha rayidka ah ee Soomaaliya si waafaqsan sharcigan iyo xeerarka caalamiga ah ee la xiriira maalgashiga (financing) iyo kiraysiga (leasing) diyaaradaha.
2. HDR waxay dhaqangelinaysaa nidaam lagu diiwaan geliyo kirada, ama qandaraasyada saamaynta ku leh lahaanshaha diyaaradaha, qalabka diyaaraduhu ku shaqayaan iyo wax ka bedelka heshiisyadaas.
3. HDR waxay keydinaysaa diiwaanka qalabka kasta oo la joojiyey ama lasii daayey si waafaqsan qodobka**n faqradda1[aad].**

## Qodobka 39aad
## Diiwaan ka saarid

1. HDR waxay si degdeg ah diiwaanka uga saaraysaa diyaarad burburtay, mid luntay lagana quustay helideeda iyo diyaarad shaqadii laga joojiyey dibna aan loo isticmaali doonin sida uu cadeeyey milkiilaheedii.

## Qodobka 40aad
## Sumada diyaaradaha

1. Diyaaradaha Somaaliya ka diiwaan gashan waa inay ka muuqataa sumada (6O) oo ICAO u qoondaysay Soomaaliya iyo haybsooca khaaska u ah diyaaradaas (special registration mark granted to each aircraft when registered.).

## Qodobka 41aad
## Dhaqangalka qodobka 83 bis heshiiska Chicago

1. Haday Soomaaliya ansixiso qodobka 83 bis ee heshiiskii Chicago wuxuu sharcigani u ogolaanayaa in ay Soomaaliya wadan shisheeye kulaheshiiso:

a. In diyaarad Soomaaliya ka diiwangashan mas'uuliaydeeda loo wareejiyo wadan kale.
b. Inay Soomaaliya aqbasho lana soo wareegto waajibaadka wadan kale ka saarnaa diyaarad ka diiwaan gashan wadankaasshisheeye.

# CUTUBKA 4$^{AAD}$

# HABRAACAGAROOMADA

## Qodobka 42$^{aad}$

## Shahaado-siintagaroomada

1. HDR waxay awood u leedahay in ay bixiso shahaado (airport operating certificate) ogolaanaysa in garoomada ay diyaaraduhu isticmaalaan, taasoo lagu sugayo heerka bedqabka hawlgalka garoomada ay ka hawl galaan diyaaradaha rakaabka ee joogtada ah (scheduled) iyo kuwa aan joogtada ahayn(unscheduled).

2. Qof walba ama Hay'addaha dawlada ee doonaya inay isticmaalaan garoon shahaado u baahan sida ku cad faqrada1 (a) ee xeerkan, wuxuu ka codsnayaa HDR shahaado garoonkoodu ku hawl galo (airport operatingcertificate).

3. Hadii ay Hay'addu hesho, baaritaan kadib, in shaqsiga ama shirkada howl-gelinaysa garoonka (airport operator) uu si waafaqsan sharcigan iyo xeer-nidaamiyayaasha loo dejiyey bed-qabka garoomada u hanan karo garoonka, waxa ay Hay'addu siineysaa shahaadada (Airport Operating Certificate).

4. Ruqsada garoomada diyaaradaha (Airport Operating Certificate) ayaa lagu sheegayaa shuruudaha lagu bixiyey iyo nooca diyaaradaha loo ogol yahay inay garoonkaas isticmaalaan si loo sugo bedqabka gaadiidkacirka.

5. Shuruudaha qodabkan lagu sheegay waxaa ka midnoqonayaa:

6. Dayactirka iyo hawlgelinta qalabka bedqabka garoonka sida gawaarida dab-damiska iyo ambalaaska, kuwaasoo deg-deg u gaari kara meelaha diyaardahu ka caga dhigtaan (Runway), ka kacaan ama ku socdaan(Taxiway).

7. Dhabaha diyaaraduhu ka degaan ama ka kacaan inay noqoto mid ku haboon isticmaal si waafaqsan heerka bedqabka eeHDR.

8. HDR waxay shirkadaha maamula garoomada diyaaradaha ka saamaxaysaa shuruudaha fulintoodu aanay suurta galka ahayn dhaqaale ahaan hadaanay wax u dhimeynbedqabka.

## Qodobka 43aad
## Hawgelinta iyo Dayactirka Garoomada Diyaaradaha

1. Maamul-gobleed walba wuxuu mas'uul ka yahay hawlgelinta iyo dayactirka garoomada ku yaalla gobolkaas isagoo kaashanayanaya HDRS, taasoo ku xiran habka ruqso siinta garoomada ee ku qeexan qodobka 4.1 eexeerkan.

2. Habraaca khidmadahagaroomada.
   a. Dhamaan maamulayaasha garoomada waxay HDR u soo gudbinayaan nuqul daabacan oo u furan kormeerka hantidhowrayaasha kaas oo ay ka muuqato qiimaha, khidmadaha iyo kharashyada ay ka qaadaan shirkadaha diyaaradaha si waafaqsan xeer-nidaamiyayaasha la xiriira adeegyadaas.
   b. Waxaa ka reeban maamule Garoon inuu qaado ama dalbado khidmad ka bedelan (different) qiimayaasha u degsan Garoonka. Sidoo kale waxa ka reeban maamulayaasha garoomada inay qayb ka mid **ah** lacagtay qaadeen dib ugu celiyaan ama ugu xawilaan shirkadihii bixiyey; waa in si isku mid ah, cadaalad ah oo waafaqsan shuruucda HDR loogu adeegaa shirkadaha isticamaalagaroonka.
   c. Xeerkani ma reebayo, iyadoo la tixraacayo shuruudaha HDR u dejisay isticmaalka garoomada, in ay maamulyaasha garoomadu qiime dhimis ama kharash ka cafis u sameeyaan diyaaraha ay isticmaasho dowlada dhexe ama dowlad goboleedyada.
   d. Maamuulayaasha garoomada waxa looga baahanyahay 30 (sodon) cisho oo ogeysiis ah haday wax isbeddel ah ku sameynayaan qiimaha, khidmada, ama kharashka ama xeer-nidaamiye saameeyn ku yeelanaya qiimaha adeegyada garoomada. Ogeysiisku waa in uu si cad u qeexaa isbeddelka la damacsanyahay in la sameeyo iyo waqtiga uu dhaqan gali doono.
   e. HDR iyadoo eegeysa danta guud, waafajinaysana sharcigan, waxay aqbalaysaa ogeysiiskan muddo ka yar 30-ka cisho ee kor ku qeexan, wayna bedeli kartaa shuruudaha la xiriira qiimayaasha adeega garoomada si kumeel gaar ah, xaalado jira awgood.

3. HDR iyadoo raaceysa habraaca ku xusan sharcigan, qiime, ama kharash kasta oo ay hawlwadeenada garoomadu ka ururiyeen ama ay ku dalaceen shirkadaha diyaaradaha, hadii ay HDR u aragto inuusan cadaalada iyo sinaanta ku dhisnayn, HDR waxa ay go'aaminaysaa qiime waafaqsan sharciga kaasoo dhaqan gelaya marka uu go'aanku soobaxo.
4. HDR markay gudanayso waajibaadkeeda ku aadan goynta qiimaha laga qaado dadka iyo badeecadaha, HDR waxay qadarinaysaa arrimo ay ka mid yihiin qodobada soosocda:
   a. Saameeynta qiimayaashaan ku yeelanaayaan dhaqdhaqaagga gaadiidka hawada.
   b. Iyadoo la eegayo danta guud, baahida loo qabo in ay hawl-wadeenada garoomadu ku bixiyaan adeegyadooda qiimaha ugu jaban ee u dhigma adeega aybixinayaan.
   c. Heerarka iyo tayada adeegga ay bixiyaan hawlwadeenada garoomada in ay yihiin kuwii uu qeexey ama uu amrey sharciga;iyo
   d. Hawl-wadeenada garoomadu baahida ay u qabaan dakhli ku filan si ay u bixiyaan adeeg dhamaystiran oo wax ku oolah.
5. Waxa reeban miisaaniyad qaran, oo aan ahayn tan ku qeexan qodobkan, (ha ahaato ama yeysan ahaan mid lala kaashado dawladda dhexe ama dawlag goboleedyada) in la isticmaalo si loogu hanto, lagu asaaso, lagu bedelo, lagu dhiso, lagu dayactiro, ama lagu hawlgeliyo meel ka mid ah dhulka geggidda diyaaradaha loo isticmaalo ama goobaha laga maamulo hawada dalka, hadii aanan ogolaasho qoraal ah laga helin Wasaaradda Maaliyadda.
6. Cid walba oo danaynaya miisaaniyada qaranka inay u isticmaasho goobaha ay degtaan ama laga hago diyaaradaha waxay ka dalbanayaa Wasiirka Maaliyadda, isaga oo raacaya shuruucda loo dejiyey ruqsadaha xiriira dhul kasta oo la soo jeediyey in laga aasaaso, laga dhiso ama loo isticmaalo goobaha laga hago diyaaradaha ama ay degtaan. Ma jiri doonto xuquuq gaar ah oo loo isticmaali karomisaaniyadda qaranka si loogu maal-galiyo goobaha ay degtaan ama laga hago diyaaradaha.

## Qodobka 44aad
## Qaybinta Maalgelinada

1. Dhammaan lacagaha ay hesho HDR, waa in lagu shubaa koontada ay Bangiga Dhexe ku leedahay Hay'adda Duulista Rayidka, kaasoo lagu asaasey sharcigan, waxaana lagu bixinayaa oo keliya ujeeddada ku xusanxeerarkan

2. Dhammaan lacagaha ay hawlwadeenada garoomada qaadaan sida: kirada, iyo khidmadaha kale ee ay dallacaan iyagoo tixraacaya sharcigan, waa in loo shubaa ama la dhigaa koonto gaar ah oo Bangiga Dhexe ee dowlada ah, si loogu maal-geliyo keliya garoomada diyaaradaha ee hawlaha la xiriira duulista hawada:
    a. Horumarinta garoomada dalka iyadoo ay ku jrto deeqaha laga helay dowlado shisheeye ama ururo calamiah.
    b. Dayactirka dhabbada diyaaradaha ka kacaan iyo agabka Kaaba hagista diyaaradaha.
    c. Horumarinta, Ballaarinta iyo dayactirka dhismayaasha terminaalka;iyo
    d. Arimaha kale ee la xiriira hawlgalada hoosyimaada hay'ada ee ku saabsan habsami u socodka hawlahagaroomada.

3. Buug-Hawleedka Garoonka (Aerodrome Manual).

4. Hawlwadeenada maamula garoomada waxay diyaariyaan, soo saaraayaan, haysanayaan "Buug-Hawleed Garoon", waana inayu soo gudbiyaan HDR, si ay dib u eegis ugu sameeyso. HDR waxay awood u leedahay, in ay wax ka beddesho buug-hawleedkaan, haddii go'aansato inay taasi lagamamaarmaan tahay. Buug-hawleedku waaa in uu ka koobnaadaa, habraacyo, sifooyin (qaababka), iyo faahfaahino waafaqsan xeer-nidaamiyayaasha Duulista Rayidka.

## Qodobka 45aad
## Ilaalinta Garoomada iyo Deegaanada ku Xeeran

1. Garoonkii haysta shahaaddo (Certified Aerodrome) wuxuu u baahanyahay xayndaab wareegsan in uu yeesho, si loo xaqiijiyo, bad-qabkiisa, nabadgelyadiisa iyo xeer-nidaamin, si waafaqsan (Lifaaqa 14) Annex 14 ee heshiiskiiChicago.

2. Hawlwadeenada garoomadu waa inay isku dubaridaan cadeymo iyo maabab (charts) tilmaamaya xadadka loo calaamadeeyey garoomada (aerodorome protection areas) ayna u gudbinayaan HDR si loogu ansixiyo. Hawlwadeenada garoomada (aerodrome operator) ayaa mas'uul ka ah ilaalinta xuduudaha garoomada. Xadgudub kasta oo lagu samayo xuduudaha garoomada waa in lagu wargeliyaa HDR, iyadoo isla markaasna maamulka garoonku qaadaayo talaabo degdeg ah si loo ilaaliyo bedqabka garoomada dalka iyo diyaaradahaisticmaala.

## Qodobka 46aad
## Dhul La Wareegis

1. Marka hay'addu ay dhul la wareegayso si ay ugu gudato hawlaheeda,
   a. Haddii dhulkaasi uusan ahayn hanti dadweyne, helitaanka dhulkaas waxa loo marayaa wada-xaajood iyo in lagala heshiiyo milkiilaha dhulku u diiwaangashan yahay;ama
   b. Hadii dhulku yahay mid dawladeed ama HDR la heshiin kari weydey milkiilaha faqrada (a), waxay Hay'addu arinta u gudbinaysaa Wasiirka mas'uulka ka ah arimaha dhulka si uu Hay'adda uga caawiyo helitaanka dhulkaas si waafaqsan shuruucda dhulka eewadanka.
2. Haddii dhulka uu si khasab ah loogu soo wareejiyo Hay'adda, magdhowga milkiilaha dhulka la siinayo waxaa bixinaya Hay'adda siwaafaqsansharciga.
3. Dhulalka Hay'adda loo soo wareejiyey waxaa loo isticmaali karaa danta guud oo keliya, waxana loo wareejin karaa laamaha dawladda oo keliya.

## Qodobka 47aad
## Dhul Ama Qalab Xukunkiisa La Hoos Geeyey Duulista Hawada

1. Si loo fududeeyo loona hubiyo amniga iyo badqabka diyaaradaha, garoomada iyo qalabka hawo gooshidda, HDR waxaa awood loo siiyey in ay:
   a. Go'aan ka gaarto dhererka dhismayaasha ku dhaw garoomadaaynakusoorogtoamardumisahwaxkastaoo

halis gelinaya habsami u socodka howlaha duulist hawada iyo garoomada.

b. Ka hortagto rakibaadda, ama taagidda xargaha korontada nooc kasta oo ay ahaadaanba oo khatar ama halisba gelin karadiyaaradaha.

c. Amarto in mulkilayaashu calaamadeeyaan (beacon lights) shay kasta oo dheer oo caqabad ku noqonaya ama halis ku ah diyaaradaha.

d. Si loo xaqiijiyo bedqabka diyaaradaha, dadka iyo hantida, HDR ayaa go'aaminaysa cabirka iyo dhererka dhismayaasha iyo siimanka ku dhow garoomada; Sidoo kale waxay HDRxukunkiisa la wareegaysaa dhulalka u dhow garoomada si waafaqsan xeer-nidaamiyayaasha DuulistaRayidka.

e. Magdhow ku dhisan caddaalad oo u dhigma qiimaha suuqa ayaa la siinayaa dadka hantidooda loola wareego dantaguud.

## Qodobka 48aad
## Fasax Heysasho La Isticmaalo Ama Wax Laga Dhiso Dhulalka Lagu Fulinayo Adeega Diyaaradaha

1. Dhismo, guryo dhaadheer, dhir, fiilooyin koronto ama isgaarsiineed, tiirar dhaadheer biyo-xireeno, biyaha kor loo tuuro oo dirjiinooyinka lagu qurxiyo, waxaa la dhisi karaa marka oggolaasha laga heysto HDR
2. Qeybta qoorsheynta dhulka ee HDR waxay dayaarinayaan dhulka HDR isticmaasho ayadoo la raacayo jadwalka ay go'aamisayHDR.
3. Ilaalinta Deegaanka iyo Xanibaadyada la Xiriira Guuxa Diyaaradaha

   Si loo ilaaliyo deegaanka HDR waxay:

   a. La tashanaysaa dowladaha iyo hay'adaha caalamiga ah, waxay dejinayasaa heerarka ugu hooseeya ee diyaaradaha iyo mashiinnada loo isticmaalo gaadiidka hawada ee hoosyimaado HDR;

   b. Hubinaysaa ilaalinta degaankasi looga hortago waxyeelo degaanku u geysto duulimaadyada;iyo

c. Samaynaysaa qorshooyin xaaladaha deg-deg ah oo loogu talagalay in lagu xakameeyo ama lagajawaabomusiibooyinka dabiiciga ah ama khataraha la xiriira gaadiidka hawada.

4. HDR waa in ay go'aamisaa xadka guuxa loo oggol yahay diyaarad, jooga ay ku duusho, xawaaraha, iyo awoooda matoorka diyaaradda si waafaqsan Lifaaqa16aad ee HeshiiskaChicago.
5. HDR waxay hubineysaa in shirkadaha ku shaqaysta diyaaradaha aysan dhaafin xadka ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan.Shaqadda waa laga joojin karaa illaa iyo inta maamulka diyaaradu ka qaado tallaabooyin saxitaan ah. Duullimaadka waa la mamnuuci karaa,ciqaabna waa lagu soo rogi karaa haddii aan loo hogaan samin xadka guuxa ee diyaaradda sida ku qoran xeerar nidaamiyayaasha hoos yimaada qodobkan.

## Qodobka 49aad
## Adeegyada Hawl Fududaynta Ee Duulista
## Hawl-fududayn, Hawlgelin iyo Xeer-nidaamiyaal

1. HDR waxay iyadoon dhaafin xadka lacagta ay kaydsatayku:
   a. Iibsanaysaa qalab iyo dhismayaal lagu horumarinayo marista hawada mar walba oo ay lagama maarmaannoqoto.
   b. Dayactiraysaa, dhowraysaa dhismayaasha iyo qalabka loo isticmaalo marista hawada. Dayactirka waxaa ka mid ah inuu qalabku cabir sax siiyo diyaaradaha. Ilaalinta waxaa ka mid ah in la xifdiyo amaanka goobaha qalabkuyaalo
   c. adeega hawo maristasi waafaqsan lifaaqyada 11, 3, 10 iyo 15 ee heshiiskiiChicago.
2. Dhaqangelinta Xeer-nidaamiyayaasha ay HDR soo saarrayso waxaa ka mid noqon doona adeegyada soo socda uguyaraan:
   a. Maamulka iyo hagida diyaaradaha hawada Soomaaliya ku goosha
   b. Qalabka isgaarsiinta diyaaradaha (Coommunication), qalabka gooshidda hawada (Navigation) iyo Qalabka lagu arko (surveillance) diyaaradaha hawada ku jira sidaRaadaarada.
   c. Adeega lagu faafiyo xogahaduulista
   d. Adeega Saadaasha hawada ee loo isticmaaloduulista.

3. HDR waxay mas'uul ka tahay xeer-nidaaminta, shahaado siinta iyo kormeerka dhamaan adeegyada hawo gooshidda (air navigation services) iyo cida bixisaadeegaas.
4. Hadii HDR ama shirkad ku xiran ay bixiso adeega hawo gooshidda (air navigation services) waa la kala saaraa (principle of separation of functions) kormeerka (oversight) iyo adeeg bixinta (service provision) sida ku cad qodobada 4.2 iyo 4.14) ee sharcigan.

## Qodobka 50aad
## Qalabka gooshidda hawada oola qalqaliyo (interference)

1. Munaaradaha iftiinka badan iyo raadiyayaasha ku shaqaya hirarka (frequency) duulista rayidka laguma rakibi karo Soomaaliya iyadoon ogolaansho laga helin HDR.

2. HDR waxay ka raraysaa halka ay yaalaan qalabkasta oo iftiin ama hir (frequency) ku **qalqal gelin** kara garoomada diyaaradaha. HDR waxay kaloo xadidaysaa ama xiraysaa wershadaha, foornooyinka IWM, kuwaasoo qaac aragtida duuliyayaasha wax u dhima ku sii daaya agagaarka garoomadadiyaaradaha.

3. Hay'adaha iyo shaqaalaha ka hawl gala gudaha iyo dibeda garoomada diyaaradaha waxaa ka reeban inay isticmaalaan raadiyayaal ku shaqaya hirarka (frequencies) garoomada diyaaraduhu isticmaalaan iyadoon ogolaansho laga helinHDR.

4. Cidii iska leh ama isticmaasha siiman koronto ama isgaarsiineed (electrical and telecommunication towers) kuwaasoo tashwiishin kara raadiyayaasha iyo qalabka maristahawada waxay u hogaansamayaan talaabooyinka HDR ku ciribtirayso tashwiishinta diyaaradaha.

5. HDR iyadoo la kaashnaysa Hay'addaha kale ee dawladda waxay ka joojin kartaa isticmaalka qalabka korontada iyo isgaarsiinta hadday lagama maarmaannoqoto.

## Qodobka51aad
## Hagida Diyaaradaha ee Hawada Soomaaliya

1. HDR waxay dejinaysaa qorshe, siyaasad, dikareetooyin, xeernidaamiyayaal ama habka loo gooshayo hawada Soomaaliya si loo sugo habsami u gooshida iy bedqabkadiyaaradaha.
2. HDR iyadoo meelmarinaysa awoodaha sharcigani siiyey, gudanaysana waajibaadka saaran waxay mudnaanta ugu weyn siinaysaa difaaca danta qaranka iyo horumarinta ganacsiga gaadiidka cirka iyo xuquuqda muwaadiniinta Soomaaliyeed u leeyihiin inay dhexmaaxaan hawobedqabta.

## Qodobka52aad
## Saadaasha Hawada

1. HDR dhexdeeda ama Hay'addaha kale ee xirfada u leh ayaa laga abuurayaa Lana joogteynayaa Adeegga  Saadaasha Hawada eeloo isticmaalo duulistahawada.
2. HDR waxay Xeer-nidaamiyayaal u samaynaysaa Adeega Saadaasha Hawada ee duulista rayidka si waafaqsan xeerarka lifaaqa 3aad ee Chicago convention iyo Ururka Saadaasha Adduunka (World Meteorological Organization - WMO).

# CUTUBKA 5AAD
# SHURUUCDA MARITAANKA HAWADA
## Qodobka 53aad
## Shuruucda Maritaanka Hawada

1. Iyadoo lawaafajinayo lifaaqa 2 (Annex 2) ee HeshiiskiiChicago Convention, HDR waxay dejinaysaa, ayna dhaqangelinaysaa:
   a. Shuruucda, Xeer-nidaamiyayaasha hagidda Dayaradaha, gooshidda hawada, isticmaalka hawada sare iyo ilaalinta rakaabka iyo hantida sarandayaaradaha.
   b. Khadadka Duulista diyaaradaha ee Xuduudaha Xawada Soomaliya

## Qodobka 54aad
## Shuruudaha guud ee laga rabo diyaaradaha

1. Dayaarad kuma duuli karto joog aan loo fasaxin oo ka hooseeya kan ay dejisay HDR, ilaa haddii ay dhacdo xaalad deg deg ah ama ogolaasho lagahaysatoHDR.
2. Diyaarad kasta waxaa ka reeban in ay ku duusho joog hoose, hadii aanay kacayn, degayn, ku jirin xaalad deg deg ah ama ogolaasho kahaysan HDR iyadoon halis gelinayn naf iyomaal.
3. Dayaarad kasta waxaa ka reebanin ay u dhawaato diyaarad kale iyadoo duulimaad ku jirta si aanay khatar ama halis shil u gelin bad-qabkeeda.
4. Duuliye kasta waxa ka reeban inuu u wado diyaarad si masuuliyad darro ah taas oo halis galin karta nolasha dadka iyo hantida.
5. Diyaaradaha sameeya qalaamo rogadka iyo kuwa daadiya waraaqaha xayeeysiiska waxa ka reebaninay duulimaadyo ku sameeyaan Hawada Soomaaliya haddii anay ogolasho ka haysan HDR.
6. Diyaarad kasta waxa ka reeban in ay hawada wax ka soo tuurto ama dhulka wax ku soo buufiso, haddii aanay dhicin xaalad deg deg ah ama ogolaasho lagahelinHDR
7. Waxa ka reeban dadka dallaayadaha (Parachutes) kagasoo booda diyaaradaha duulaya, ayagoon ogolaasho hore uga haysan HDRama aanay jirin xaalad deg degah.
8. Qof kasta oo isticmaalay maan-dooriye ama wax kastoo wiiqi karo awooda gudashada waajibaadkiisa waxa ka reebanin uu duuliyo diyaarad ama uu kamid noqdo shaqaalaha ka adeega diyaarada gudeheeda. (Crewmembers).
9. Diyaaradaha aan cidna wadin (Drone) ama kuwa remote-ka lagu hago (RC airplanes) kuma duuli karaan xuduudaha HawadaSoomaaliya haddaanay fasax ka haysan HDR
10. Diyaarad majiidi karto dayaarad kale haddii aanay fasax ka haysan HDR Diyaaradaha guuxooda aad u sareeyo waa ka mamnuuc in ay dulmaraan deegaanka Soomaaliya iyo in ay kusoo digaan garoomadda ku yaal Soomaaliya ayaga oon fasax khaas ah ka haysan HDR. Fasaxani waxaa lagu cayimayaa Joog iyo xawaaraha uu ku duulayoduuliyaha

## Qodobka 55aad
## Aagga laga xadiday diyaaraha, kuwa laga mamnuucay iyo kuwa khatarta ku ah

1. HDR waxay ka mamnuucaysaa ama xadidaysaa dayaaradaha dul maro:
   a. Aagag ka mid ah deegaanada soomaaliyeed sababo amni darteed ama ilaalinta dantaguud.
   b. Sida lagu qeexay qodobada 1 iyo 2 ee go’aanadii heshiiska Chicago ama qeyb kasta ka mid ah xaaladaha gaarka ah ee sababaha la xiriira danahadadweynaha.
2. HDR waxay awood u leedahay in ay sameyso daabacaada aagagga khatarta ah iyo in ay qeexdo hababka la raacayo marka la dulmarayo.

## Qodobka 56aad
## Walxaha Khatarta iyoHubka

1. Diyaarad, lama saari karo walxaha khatarta ah, ilaa laga helo oggolaasho HDR ayadoo la raacayo Xeerarka, Nidaamka iyo Shuruucda ay dajisay HDR, siwaafaqsan Lifaaqa 17 ee ICAO (Annex 17) kaasoo qeexaya sida ugu bed-qabsan (safe transport) ee xamuul noocan ah lagu qaadi karo. Waxyaabaha khatarta ah waxaa kamidah:
   a. Walxahaqarxa
   b. Hubka iyo rasaasta
   c. Nukliyeerka iyoshucaaca
   d. Gaasaska iyo walxaha kale ee suntaah
   e. Jeermiska
   f. Wax kasta oo kale oo ay go'aamiso hay'addaha ku shaqada leh.
2. Haddii laga dhex helo walxaha halista ah xamuul ama boorsooyin lagu qaadayo diyaarad ganacsi ee caalimiga ah, waxaa masuuuliyadda qaadaya qofka aqbalay in diyaarada lagu raro, ha ahaato dayaarad soo degtay ama ka tagaysa dalka Soomaaliya in xamuulkaa loogu qaado diyaarada si waafaqsan qodobbada Lifaaqa 17 ee ICAO (Annex 17) ee heshiiskii Chicago iyo in la raaco tilmaamaha-ICAO ee la xiriira sidii si nabad ah looguqaadi

lahaa alaabtaa khatarta ah, lana raacayo shuruudaha dheeriga ah la xiriira arintan ee ay soo saartayHDR.

3. Waxaa reeban in uu qof la fuulo diyaarad hub ama walxaha ololka (holaca) sahla ama wax kasto oo loo isticmaali karo in wax lagu burburiyo, argagax galin ama lagu khatar galiyo amaanka iyo nabad-gelyada rakaabka iyo hantida inta lagu jiro duulimaadka. Haddii fasax looga haysto DHR, waxaalaguwareejinayaa hubkiisa shaqaalaha dayaaradda inta duulimaadka lagu jiro waxaana dib loogu wareejinayaa milkilihii marka ay degayodiyaaradda.
4. Waxaa kaliya dayaaradda hub la fuuli kara ciidamadda police-ka iyo ciidamadda nabadsugidda kadib marka uu ogalaado Captain-ka dayaaraddawada.

## Qodobka 57aad
## Masuuliyadda Duuliyayaasha Diyaarada

1. Captain-ka dayaaradda wuxuu mas'uul kayahay:
   a. In uu u wado dayaaradda sida waafaqsan shuruucda hawadda.
   b. Inuu raaco nidaamka lagu maamulo **gegida** iyo sharciyada gaadiidka hawada.
   c. Inuu raaco dhammaan oggolaanshaha iyo awaamiirta uu bixiyo hagahadayaaradaha.
   d. In uu hubiyo in diyaaraddu wadato shidaal ku filan duulimaadkeeda.
   e. In uu xaqiijiyo duulimaadka in uu yahay mid nabdoon sida waaf**a**qsan shuruucda iyo nidaamyadaduulimaadka
   f. In la hubiyo hannaanka badqabka dayaaradda ka hor intii ayan kicin.

## Qodobka 58aad
## Qofka Mas'uulka ka ah Diyaaradda Dhexdeeda

1. Captain-ka dayaaradda wada ayaa masuul ka ah hawlgalka, amniga iyo bed-qabka diyaaradda inta duulimaadka lagu jiro, awood asaga ayaa u leh in uu qaado tilaabo ku haboon si loo ilaaliyo nidaamka dayaaraddadhexdeda.

2. Qofkasta oo aan ogolaansho haysan waxa ka reeban faragelin hor istaagi karta hawlgudashada shaqaalaha dayaarada. Qof kasta waxa ka reeban inuu wax ka bedelo qayb ka mid ah ama qalabka dayaaradda ama uu ku kaco fal wax yeeli kara bedqabka diyaaradda amarakaabka.

## Qodobka 59aad
## Isticmaalka Garoomada iyoRaacida Qorshaha Duulimaadka

1. Diyaarad kuma degi karto garoon aan aheyn kii ay ku qoratay qorshaha duulimaadka (flight plan) marka laga reebo xaalad deg-deg ah iyadoo la raacayo amaradda Hagaha Diyaaradda (ATC) ama oggalaashahaHDR.
2. Diyaarad kasta oo imanaysa ama ka baxaysa xuduudaha Soomaaliya waxay degeysaa ama ka kacaysaa garoon caalami ah, marka laga reebo inay haysato oggolaansho ay kaga gudubto hawada dalka iyadoon degin. Diyaardaha qayb ka mid ah waxaa laga qaadi karaa xayiraadan iyadoo lafiirinayo qaabka hawlgalkeeda ama tixgelin kale. Oggolaanshahaasi wuxuu qeexii doona garoonka ay diyaaraddu degeyso, kay ka baxayso iyo Khadka ayraacayso.
3. Haddii diyaarad caalami ah ka kaceyso, soo dagayso ama dul mareyso wadanka Soomaaliya oo ay ku degto garoon aan aheyn garoon caalami, captain-ka diyaaradda waa in uu si deg deg ah u ogeysiiyo maamulka meesha ka jira una gudbiyo macluumaadka dayaaradda. Duuliyaha ma dajin karo rakaabka iyo xamuulka ilaa uu ka heysto fasaxHDR.
4. Haddii diyaarad ay imanayso, ka baxayso ama ay kormareyso hawada xuduudaha Soomaaliya oo ay ku qasbanaato inay kusoo degto meel ka baxsan Garoomada caalamiga ah, duuliyaha waxaa waajib ku ah inuu sida ugu dhaqsaha badan u soo wargeliyo maamulka dowladda ee goobtaas, waana inuu la wadaagaa macluumaadka duulimaadka iyo diyaaradda ama wax kasta oo kale oo dukumenti ah oo laga dalbado. Haddii arintan oo kale dhacdo, dejinta xamuulka ama rakaabka diyaaradda waa ka reebantahay in lagu dejiyo aaga degitaanka diyaaradahakahor

inta aanay helin ogolaasho ay bixisay Hay'adaha ay khusayso iyadoo la raacayo shuruucda u degsan duulimaadka rayidka ah.

5. Duuliyaha koowaad waxaa waajib ku ah inuu raaco barnaamijka duulimaadka ee ogolaashaha haysta iyo dhamaan amarada kasoo baxay hagaha diyaaradaha (ATC). Waxaa sidoo kale waajib ku ah inaanu ka leexan khadka hawada ee loo ogolaaday marka laga reebo xaaladaha deg-dega ah ee horseeda inuu qaato talaabo deg-deg ah. Hadii xaaladahani dhacaan duuliyaha koowaad waa inuu soo wargeliyaa hagaha diyaaradah ee ku shaqada leh si deg- deg ah, waana inuu helaa ogolaasho cusub hadii loobaahdo.

## Qodobka 60aad
## U Hoggaansanaanta Sharciyada Dalka

1. Rakaabka, hawl-wadeenada diyaaradaha (crew members), shirkadaha dhoofiya xamuulka iyo wakiiladooda waa in ay u hogaansamaan shuruucda, xeerarka iyo xeer-nidaamiyayaasha lagu dhaqo soo galida, joogitaanka iyo ka bixida xuduudaha dalka Soomaaliya. Sharuucdaas iyo xeer-nidaamiyayaashaas waxaa waajib ah inay iska kaashadaan HDR iyo Hay'addaha kale ee ku shaqada leh sida Hay'adda Socdaalka, Caafimaadka, Maaliyadda ama kuwa kale ee muhiimka ah si waafaqsan lifaaqa sagaalaad ee heshiiska Chicago (ICAO Annex9).

# CUTUBKA 6AAD
# U-QALANKA DUULISTA EE DIYAARADAHA (AIRWORTHINESS)

## Qodobka 61aad
## Shahaadada U-Qalanka Diyaaradaha (Certificate of Airwirthiness)

1. Diyaarad Kama shaqo geli karto wadanka Soomaaliya iyada oon haysan shahaado cadeynaysa inay duuli karto diyaaradu farsamo ahaan ruqsadaas oo uu bixiyey ama ansixiyey wadanka ay diyaaradu ka diiwaan gashantahay ama HDR Soomaaliya si waafaqsan lifaaqa 8aad ee heshiiska Chicago (ICAO Annex8).

2. Qofka adeegsanaaya diyaarad ka diiwaangashan Soomaaliya waa in uu cusboonaysiiyaa shahaadada u-qalanka diyaarada si waafaqsan xeerarka HDRSoomaaliya,
3. Hayadda Duulista Rayidka oo kaashanyasa Hay'addaha kale ee Caalamka, waxay soo saaraysaa shuruuc iyo xeernidaamiyaal la xiriira dayactirka qalabka diyaaradaha iyo isticmaalkiisa si loo sugo bedqabka diyaaradaha iyorakaabka.

## Qodobka 62aad
## Kala Noqoshada ama Hakad Gelinta Shahaadada U-qalanka Diyaarada

1. Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyedwaxay:
   a. Kala noqon kartaa ama hakad gelin kartaa Shahaadada U-Qalanka Duulista diyaarad ka diiwaan gashan Soomaaliya, haddii la ogaado in aanay diyaaradu farsamo ahaan u qalmin inay duulimaadsamayso.
   b. ka joojin kartaa diyaarad uu ku socdo baaritaan cilad farsamo ilaa laa hubiyo bedqabkeeda. Arintaas waxaan ku jirin, ogolaansho la siiyey diyaarad inay duusho rakaab la'aan iyadoo la raacayo xeernidaamiyayaal la dejiyey.

## Qodobka 63aad
## Shirkad Dayactir
## (Authorized Maintenance Organization)

1. Cidii ku shaqaysata diyaarad ka diiwaangashan Soomaaliya waa inay ku dayactirto diyaarada motooradeeda, raadiyeyaasheeda iyo qaybaha kale ee diyaarada Shirkad Dayactir oo HDR Soomaaliya siisay ogolaansho (Approved MaitenanceOrganization).
2. Hay'adda Duulistu waa aqbali kartaa shirkad dayactir oo wadani ah ama mid ajnabi ah inay dayactir u sameyso diyaarad ka diiwaan gashan Soomaaliaya. HDR waxay hubinaysaa in dayactir dhamaystiran loo samayeynkaro diyaaradaha, kharashka ku baxa hubintaas waxaa bixinaya shirkada la hubinayo.
3. HDR waxay hakin kartaa ama la noqon kartaa shahaadada shirkad samaysa dayactirta diyaaradaha hadii shirkadaas lagu helo awood yari farsamo ama ay hor istaagto kormeerayaasha HDR inay baaraan xarumaha dayactirka eeshirkadaas.

## Qodobka 64aad
## Dayactirka Diyaarada Iyo
## Diiwaanka Socdaalka (Log Book)

1. Duuliyaha kowaad ee diyaarad kasta oo ka diiwaangashan Soomaaliya taas oo samaynaysa duulimaad waa inuu ku qoraa diiwaanka socdaalka waxyaabaha soosocda.
   a. Waqtiga duulimaadku bilowday iyo saacada uudhamaaday.
   b. Ciladaha farsamo ee diyaarada iyo qalabka saaran lagu arkay mudaday duulimaadka kujirtay.
   c. Saxiixa duuliyaha iyo taarikhda uu xogtaqoray

2. Shirkada ku shaqaysata diyaaradaha ayaa masuulka ah kaydinta xogta farsamo ee diyaaradda, waana in nuqul ka mid ah xogtan lagu hayaa meel ka baxsandiyaarada.

3. Xogta dayactirka matoorada diyaaradda, marawaxadaha iyo macluumaad walba oo farsamo taas oo HDR u baahan tahay waa in lagu qoraa diiwaanka farsamo ee diyaaradaha mudo 7 cisho gudahood ah laga bilaabo maalinta dayactirka la dhamaystiray.

4. Shirkad kasta oo ku shaqaysata diyaarad waa inay kaydisaa xogta dayactirka farsamo ee diyaarada ugu yaraan labo sano ka dib marka diyaarada shaqada lagafariisiyo.

5. Diyaarad walba oo ku duulyasa hawada Soomaalia waa inay sidataa dukumentiyada lagu taxay qodobka 29$^{aad}$ ee hehiiska Chicago iyo tirsiga 8.1 ee sharcigan.

## Qodobka 65aad
## Shaqo ka Fariisinta Diyaarad Khatar Ah

1. HDR Waxay fariisin kartaa diyaarad kasta oo khatarteedu muuqato kadib marka la siiyo cida iska leh diyaarada fursad ay ku cilad bixiyaan. Hadii diyaarada laga leeyahay wadan shisheeye waxay HDR si dhaqso ah u wargelinaysaa hay’addaha bedqabka eewadankaas.

## Qodobka 66aad
## Qalabka Diyaaradaha

1. Diyaaradi ma shaqayn karto hadaanay ku qalabaysnayn dhamaan agabkii looga baahnaa gooshidda hawada iyo isbedbedelka cimilida sida ku cad shahaadad duulis u-qalanka iyo lifaaqyada heshiiska Chicago (Chicagoconvention).
2. Hay'addu waxay faraysaa diyaaradaha ka diiwaan gashan wadanka in lagu rakibo qalab dheeri ah, si loo sugo bedqabka diyaaradaha, duuliyayaasha iyo rakaabka, loona fududeeyo hawlaha baadigoobka iyobadbaadada.
3. Hadaanay ku qornayn shahaadada duulis u-qalanka, qalab dheeri ah laguma rakibi karo diyaarad ka diiwaan gashan Soomaaliya iyadoon ogolaansho laga helin HDR.
4. Qalab ku qoran shahadadda duulis-karka lagama furi karo diyaarada iyadoon ogolaansho laga helinHDR.

## Qodobka 67aad
## Tirada Qalabka Ugu Yar
## Ee Diyaaradu Ku Shaqayn Karto

1. Shirkadaha diyaaradahu waxay soo gudbinayaan "tirada ugu yare ee qalab ah" ee diyaarad walba oo ay isticmaalaan ay ku shaqayn karto iyagoo la kaashanaya wershadii samaysay diyaarad kasta. Hadii uu jiro qalab ciladaysan ama isticmaalkiisa la xadiday, waa in ogolaansho laga helaa HDR sidaasna diyaarada lagu hawl geliyaa.

## Qodobka 68aad
## Koormeerada U Qalanka

1. Kormeerayaasha HDR waxay xaq u leeyihiin inay tijaabiyaan ama cilad baaris kusmayaan, qalabka diyaaradu ku shaqyso sida matoorada, raadiyayaasha IWM, iyagoo hubinaya duulis u-qalankadiyaarada.

2. Kormeerayaasha HDR waxay awood u leeyihiin inay galaan meel kasta oo diyaaradda ka mid ah waqti walbaiyagoo hubinayaa

duulis u-qalanka diyaarada, kharashka ku baxa hawshan waxaa qaba shirkada loo shaqaynayo.

3. HDR waxa ay xaq u leedahay in ay fariimo la xiriira duulis u-qalanka u dirto shirkadahadiyaaradaha.

4. HDR waxay xaq u leedahay inay hakad geliso shahaadada duulis-karka hadii lagu xadgubo qodobada xeerkan.

# CUTUBKA 7AAD
# DUKUMENTIYADDA IYO DIIWAANADA DIYAARADAHA

## Qodobka 69aad
## Dukumentiyada laga rabo in ay Diyaaraddu sidato

1. Diyaarad kasta oo ka diiwaan gashan Soomaaliya ma duuli karto hadii aanay wadan dukumentiyada hoos kuqoran.
   a. Shahaadada diiwaangelinta diyaarada (certificate of registration).
   b. Shahaadada duulis u-qalanka lagu cadeeyey in aanay cilad qabin duulina karto (Airworthinesscertificate),
   c. Leysamada duuliyayaasha iyo engineeradadiyaarada
   d. Diiwaanka duulimaadyada ay diyaaradu samaysay iyo aqbalaada guud ee la siiyeyduulimaadka.
   e. Shatiga raadiyayaasha saarandiyaarada.
   f. Buugaga hawlgalka iyo dukumentiyada dayactirka iyo dukumentigii kale ee HDR ubaahato.
   g. Liiska rakaabka, xamuulka, boostada iyo soo gudbinta faahfaahin la xirriirta wixii kale ee diyaaradu waddo.
   h. Nuqulada caymiska oo rasmiah.

2. Duulimaadka Caalamiga ah diyaaradaha wadanka gudihiisa isaga goosha waxa laga rabaa arimaha lagu xusay faqrada (1) ee qodobkan,

3. HDR waxa ay ka khafiifin kartaa qayb ka mid ah shuruudaha diyaarad loo duuliyey tijaabo ama tababarduuliye.

## Qodobka 70aad
## Tusid Dukumiinti

1. Duuliyaha Kowaad iyo shirkada uu u shaqayo waxay u soo gudbinayaan HDR markay codsato dhamaan dukumentiyada iyo xogaha xeerkan ku qeexan ama xeer-nidaamiyayaasha (regulations) kale eeHDR.
2. Hadii HDR la laabato ogolaansho, shahaado, ama shati ay bixisay, milkiiluhu waa inuu dib ugu soo celiyaa dukumentiga haday HDR codsato.

## Qodobka 71aad
## Sugida Dukumiintiyada

1. Milkiilayaasha ama shirkadaha diyaaraddaha waxaa ku waajib ah in ay kaydiyaan xogaha diyaaradda iyo dukumentiyada hawlwadeenda diyaaradaha. Xogtaas waa la haynayaa xataa hadii la joojiyo isticmaalka diyaaradaas iyadoo la tixgelinayo arrimaha soosocda.
    a. Hadii labo shirkadood diyaarad ka diiwaan gashan Soomaaliya la kala wareegaan iyagoo ku sugan wadanka gudihiisa, waxaa shirkadii horay u haysatay diyaaradda laga doonayaa in ay ku wareejiso shirkada dambe dhamaan dukumentiyada ay ku jiraan kuwa dayactirka IWM.

    b. Hadii matoor ama marawaxad helikobtar IWM, loo kala furo labo diyaaradood oo Soomaaliya ka diiwaan gashan waxa laga doonayaa shirkada leh diyaarada qalabka laga furay in ay ku wareejiso cidda iska leh diyaarada dambe dhamaan xogaha iyo dukumentiyada qalabka loowareejiyey.

    c. Haddi xubin ka tirsan hawl-wadeenada diyaarad ka diiwaangashan Soomaaliya loo wareejiyo shirkad kale si uu ula shaqeeyo, shirkada hore waa inay gacanta u gelisaa tan dambe xogta qofka la soo wareejiyey. Shirkada cusub waa inay dhawrtaa xogta dukumentiyada loo soowareejiyey.

## Qodobka 72aad
## Dukumiinti Loo Isticmaalo Si Sharci Daro Ah

1. Waxa reeban falalka soosocda:
   a. Isticmaalka shahaado, shati, ogolaansho ama dukumenti kale oo HDR dib ula noqotay, hakisay ama wax kabedeshay.
   b. U gudbinta shahaado, shati, ogolaansho ama dukumenti kale oo ay bixisay HDR in uu isticmaalo qof aan ahayn kii la siiyey.
   c. Isu ekaysiin qof kale iyadoo ujeedadu tahay in la cusboonaysiiyo ama wax laga bedelo shahaado, shati, ogolaansho ama dukumenti kale, si uu u istismaalo shakhsi aan ahayn kii lasiiyey.
   d. Burburin, tirtiris ama wax ka bedel dukumenti iyo xog hoos imanaysa xeerkan ama in lagu kordhiyo xogkhaldan.
   e. Tirtiris xogta ku qoran liiska xamuulka ama in lagu qorobeen abuur lagu talagalay ama khalad udhacay.

# CUTUBKA 8AAD
# SHATIYO AMA RUQSADO

## Qodobka 73aad
## Ruqsadda Hawlwadeenada Duulista Iyo Qiimeyntooda

1. Qofkasta oo ka mid ah hawlwadeenada duulimaadyadda iyo duuliye kasta waa in uu haystaa SHATI iyo qiimeyn (rating) ay siisay ama u ansixisay HDR si waafaqsan xeerkan iyo sharciyada kale ee ku haboon. HDR waxay ku xadidi doontaa xeerarkeeda shuruudaha lagu bixiyo, ansixiyo iyo kuwa lagu ogolaado shati, shahaado ama qiimeyn (rating) xirfadeed si waafaqsan lifaaqa koowaad ee heshiiska Chicago (in conformity with Annex 1 to the Chicago Convention.)

2. Shaqaalaha aan duulin laakiin bixiya adeegyada hawo marista sida kuwa haga diyaaradaha iyo hawlaha la xiriira waxay HDR ku waajibinaysaa inay haystaan shatiyo, shahaadooyin iyo qiimeyn-xirfadeed (rating) si waafaqsan xeerarkaHDR.

## Qodobka 74aad
## Aqoonsiga Shati Iyo Qiimeyn-Xirfadeed (Rating) Wadan Kale Laga Bixiyey

1. Shatiyadaiyo qiimeyn-xirfadeedka (ratings) duuliyayaasha ama shaqaalaha kale, kuwasoo waddan kale laga bixiyey ama laga aqoonsaday, HDR way ansixin kartaa shatiyadaas hadday u dhigmaan ama ka sarayaan heerarka ku xusan lifaaqa kowaad ee Chicago convention.

## Qodobka 75aad
## Hakad Gelin iyo La Noqosho Shati

1. Hadii milkiilaha shati u hogaansami waayo xeerkan iyo shuruucda kale ee la jaalka ah, HDR waxay ku wargelin doontaa milkiilaha shatiga qiima dhaca ku yimid iyadoo u qabanaysa mudo uu ku soo kabto. HDR waxay hakad-gelinaysaa ama shatiga kala noqonaysaa milkiiliha waqtiga loo mudeeyey ku soo kaban waaya. Shati kasta oo la hakiyey ama lala noqday HDR ayaa si degdeg ah loogu soo celinayaa.

2. Wuxuu xeerku qabaa, in HDR si degdeg ah hakad u geliso ama dib ula noqoto shati markay dhacdo xaalad degdeg ah oo saamaynaysa bedqabka (safety) guud iyo arimo gaarah.

3. Hadii loo baahdo in rafcaan laga qaato go'aanada HDR, waxa la raacayaa xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka udegsan.

## Qodobka 76aad
## Machadyada Tababarka DuulistaHawada

1. HDR waxay samaynaysaa xeer-nidaamiyayaal lagu dhaqo Machadyada tababara shaqaalaha Duulista Rayiidka, waxayna ansixin doontaa keliya Machadyada buuxiya shuruudaha loo dejiyey.
2. Waxa ka reeban naadiyada daneynaya duulista, dugsiyada tababara duuliyayaasha, shirkadaha ama shakhsiyaad gaar ah inay bixiyaan tabobar duulimaad IWM, hadaanay ogolaansho ka haysan HDR. HDR waxay ogolaansho tababar lagu bixiyo siin doontaa cidii buuxisa shuruudaha udegsan.

# CUTUBKA 9AAD
# GANACSIGA GAADIIDKA CIRKA

## Qodobka 77aad
## Xeer-Nidaamiyayaasha Lagu Maamulo Ganacsiga Gaadiidka Cirka

1. HDR waxay dejineysaa oo kormeeri doontaa siyaasad lagu horumariyo ganacsiga gaadiidka cirka, iyadoo eegaysa koboca dhaqaalaha wadanka waqtiga la joogo iyo kan soosocda.
2. HDR iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Arrimaha Dibeda waxay kala xaajoonaysaa wadamada kale heshiisyada isdhaafsiga duulimaadyada diyaaradaha iyo heshiis walba oo calami ah lana xiriira gaadiidkacirka.
3. HDR waxay kormeereysaa kana qayb geleysaa wada-hadalada u dhexeeya shirkadaha wadaniga ah iyo kuwa ajnabiga ah, si ay u gaaraan heshiis maalgashi oo wadajir ah iyo ganacsi walba oo la xiriira gaadiidka cirka si waafaqsan shuruudaha wax isku darsiga eeshirkadahaas.
4. HDR waxay kor-meereysaa dhaqdhaqaaqa shirkadaha dalka ee ku ganacsada gaadiidka cirka, iyadoo siinaysa ogolaansho ay ku hawl galaan, waxaanay HDR aqbashaa ama wax ka bedeshaa magaalooyinka diyaaraduhu u safraan (air routes) iyo tirada duulimaadyada (flight frequency).
5. HDR waxay si dhow ula socotaa dhaqdhaqaaqa shirkadaha ajnabiga ah ee ku ganacsada gaadiidka cirka iyo siday u fuliyeen xuquuqada/waajibaadka ku cad heshiiskii laba geesoodka ahaa ee lala galaywadamadooda.
6. HDR waxay hakad gelisnayaa ama xadidaysaa dhaqdhaqaaqa shirkadaha wadaniga ah ama kuwa shisheeye ee ku ganacsada gaadiidka cirka haday shirkadahaasi ku xadgudbaan shuruudihii lagu siiyey shatiga ama heshiiskii laba geesoodka ahaa ee Soomaliya la gashay wadamadooda ama qodobada sharcigan.
7. HDR waxay ogolaansho siinaysaa shirkadaha dalka ama kuwa ajnabiga ah inay samayaan duulimaadyo aan jadwalka ku jirin iyadoo la tix-gelinayo xaalado gaarah.
8. HDR waxay hubineysaa in tartanka shirkadaha sida joogtada ah uduulaiyokuwaaanjadwalkakujirineeqiimahatigidhadaiyo

kirooyinka diyaaradaha uu noqdo mid ku dhaca si cadaalad ah (fair competition).

9. HDR waxay bixinaysaa ogolaansho ay diyaaradaha shisheeya xafiisyo kaga furtaan wadanka ama ku wakiishaan shirkado wadani ah, halka shirkadaha shisheeye si la mid ah wakiil uga noqdaan wadankooda (principal of reciprocity).
10. HDR waxay ogolaansho siinaysaa shirkadaha wadaniga ah ama kuwa shisheeye ku noqdaan wakiilo ganacsi iyo xamuul wadanka gudihiisa iyadoo dejinaysa xeer-nidaamiyayaal lagu maamulo dhaqdhaqaaqooda.
11. HDR Waxaa ku waajibiya in ay dejiso, tafatirto hirgelisana siyasadda iyo stratejiyadda lagu hormarinayo dulimadyadda rayidka ah ee wadanigaah.
12. HDR waxay wada shaqayn dhow la yeelanaysa shirkaddaha dulimadyadda ee wadaniga ah si kor loogu qaadi laha loona kobcin lahaa adeega dayaradaha, dulimadyadda iyo **warshadaha** guud ahaan.
13. HDR waxay ilaalinaysa xuquuqda shirkaddaha wadaniga ah iyadda oo si buxdda ugu dhowraysa xuquuqda dulimadyadda dalka gudihiisa dibidiisa iyo xuquuqda 5 aad iyo 6 aad ee dulimadyadda.
14. HDR waxay si dhow ula socodsiineysaa ulana wadaageysaa macluumaadka soo kordha ee duulista rayidka, kuna casuumeysaa shirarka looga hadlaayo duulimaadyada rayidka dalka iyodibadiisa.
15. HDR waa inay ilaalisaa fasaxa ay siineyso diyaaradaha Ajnabiga oo toos u imaanaya dalka, iyadoo ilaalineysa xuquuqda diyaaradaha wadaniga, waana inay xadaysaa maalmaha duulimaadka ku imaaneyso, waana inaan loo ogolaanin dalka intiisa kale, ayadoo loo daneynayo diyaaradaha Wadaniga ah, sidda ku cad xeeraraka caalamiga ah.

## Qodobka 78aad
## Bixinta iyo Hakad-Gelinta Shahaadada Hawlgalka (Operational Certificate) iyo Shaqooyinka Lagu Ogolaaday Shahaadada.

1. Shirkadaha diyaaradaha waxaa ka reeban hawlgelinta diyaarad ilaa ay ka helayaan ruqsad ay ku cadahay nooca shaqo ee HDR u ogolaatay. Shirkadaha diyaaradaha waa inay geeyaan nuqul ka mid ah shahaadadooda xarun walba oo ay ka hawlgalaan
2. Shirkadaha diyaaradaha waxay bedelayaan nooca shaqo ee ay qabtaan (specifications), ka dib markay ogolaanshaha ka helaan HDR.
3. HDR waxay awood u leedahay inay joojiso ama xadido dhaqdhaqaaqa ganacsi ee shirkad diyaaradeed oo wadani ama ajnabi ah, haday ku xadgudubto shuruudihii ruqsada lagu siiyey, heshiiskii u dhexayey Soomaaliya iyo dalka diyaarada laga leeyahay ama qodobadaxeerkan.
4. Tirakoobka (Statistics) GaadiidkaCirka
   a) Shirkadaha dalka laga leeyahay iyo kuwa ajnabiga ah ee ka dhex shaqaya ama kor mara Soomaaliya waa inay HDR u soo gudbiyaan dhamaan macluumaadka ay codsato kuwaasoo ay ku jiraan jadwalka duulimaadyada, tirakoobka hawlgalada iyo tirkoobka guud eeduulista,
   b) HDR waxay la wadaagaysaa xogta tirakoobyada Hay'adda ICAO markii loo baahdo.

## Qodobka 79aad
## Aasaaska Shirkado Diyaaradeed (Shuruudaha Maaliyadeed Iyo Kuwa Ganacsi)

1. HDR oo xiganaysa sharciga shirkadaha (company law), lana kaashanaysa Wasaaradaha khuseeya dhaqaalaha qaranka waxay soo saaraysaa oo faafinaysaa shuruudaha iyo nidaamka looga baahan yahay aasaasida shirkad diyaaradeed oo doonaysa inay Soomaaliya ka ganacsato. Shatiga Hawlgalka Hawada (AOC) waxaa la bixin karaa marka shirkadda la sameeyo.

## CUTUBKA 10AAD
## KHIDMADAHA
### Qodobka 80aad
### Khidmada Laga Qaado Gaadiidka Cirka

1. HDR waxay jaangoyneysaa khidmada diiwaangelinta diyaaradaha, bixinta, oggolaanshaha, cusboonaysiinta, beddelidda shatiyada, shahaadooyinka, oggolaanshaha, iyo kharashka laga qaado shirkadaha isticmaala adeegyadaHDR.
2. HDR khidmada kuma kala takoori karto macaamiisha kala duwan ee isticmaala garoomadda iyo hawadda sida uu dhigayo nidaamka caalamiga eeICAO.

### Qodobka 81aad
### Khidmad ka dhaafid

1. Diyaaradahansoosocdawaalagadhaafayaakhidmadakorlaguxusay
    a. Diyaaradaha ay leeyihiin laamaha kala duwan ee Dawlada Soomaaliya ee aan samaynayn duulimaadganacsi.
    b. Diyaaradaha ku safraya tixgelin diblomaasiyadeed iyo
    c. Diyaardaha ka qayb qaadanaya baadi goobka iyo samato bixinta (Search and RescueOperations)

## CUTUBKA 11AAD
## HAWLAHA BAADI-GOOBKA IYO SAMATA-BIXINTA

### Qodobka 82aad
### Isku dubaridka iyo xeer-nidaamiyayaasha

1. HDR ayaa mas'uul ka ah taakulaynta diyaaradaha iyo rakaabka marka ay diyaarad lunto, burburto ama ay la soo gudboonaato xaalad deg-deg ah ama ay ku dhacdo dhibaatooyin khatar gelinayabed-qabkeeda.
2. HDR waxay u xil saari kartaa hawlaha baadi-goobka iyo samata-bixinta, hay'ad kale oo si buuxda ugu qalabaysan adeegyadaas ama aan ka fogeyn goobta masiibadu ka dhacday.
3. Qofna kama reebana bixinta taageero kasta oo lagama maarmaan u ah hawlaha baadi-goobidda iyo samata-bixinta marka Hay'addaha ku hawlani codsadaangurmad.

## Qodobka 83aad
## Mas'uuliyadaha baadi-goobka iyo samata-bixinta

1. HDR waxay sameeneysaa xarun laga maamulo hawlaha baadi-goobka iyo samata-bixinta waxayna mas'uul ka noqonaysaa isku-duwidda howlgalada gurmadka si waafaqsan nidaamka Hay'adda Caalamiga ah ee Duulista Rayidka kuna xusan Lifaaq 12aad ee Heshiiskii Chicago.

2. HDR waxay abaabulaysaa kooxaha gurmadka ee heer qaran si ay u noqdaan heegan buuxa iyadoo la raacayo qorshayaasha bad-baadada ee hore loodejiyay.

3. HDR waxay qaadaysaa talaabooyinka lama huraanka ah si loola shaqayo loona kaashado hay'adaha badbaadada ee ka yimid dalalka shisheeye hawlaha la xirira baadi goobida iyo samatabixinta

## Qodobka 84aad
## Baadi-goobida iyo Samatabbixinta Goobaha aan la Ogoleyn in la Dul Maro

1. HDR, iyadoo kormeeraysa, waxay u oggolaanaysaa dadka iyo diyaaraddaha wada hawlaha baadigoobka iyo samata-bixinta goobaha aan la ogolayn in diyaaadi dulmarto marka lagu tuhmo in shil ka dhacaygoobtaas.

## Qodobka 85aad
## Magdhow iyoKharash

1. Kharashka baadigoobka iyo samata-bixinta waxaa bixinaya shirkada diyaarada leh ama ceysmiskooda, diyaaradaas oo ah mida la badaadinayo, waxay kaloo bixinaysaa khasaaraha ka dhasha hawsha baadigoobka iyo badbaadada iyo mushahar-maalmeedka shaqaalaha aan samafalkaahayn.

## Qodobka 86aad
## Magdhowga Hawlgalada Baadi-Goobka iyo samata-bixinta

1. Maxkamadaha Soomaliya waxay qaadayaan dacwadaha magdhaw sheegashada hawlaha baadi-goobka iyo samata-bixinta. Marka shilku ka dhaco wadanka Soomaaliya gudahiis, badahafog-fog ama meel ka baxsan madax banaanidaQaranka.

   a. Haddii diyaaradda qabatay hawlaha baadi-goob iyo badbaadinta ay ka diiwaan gashantay wadankaSoomaaliya

   b. Haddii qofka dacwoonaya uu yahay muwaadinSoomaaliyeed

   c. Haddiidiyaarada shilka gashay la ga helo waddanka soomaaliyagudahiisa

# CUTUBKA 12AAD
# BAARITAANKA SHILALKA DIYAARADAHA
## Qodobka 87aad
## Shilalka Diyaaradaha Rayidka ah

1. Wasaarada Gadiidka Cirka iyo Dhulka waxaa waajib kuah:

   a. In ay dejiyo shuruuc iyo xeer-nidaamiyayaal lagu dhaqo wargelinta iyo warbixinta shilalka diyaaradaha rayidkaah;

   b. In ay baarto shilalka, kana warbixiso xaqiiqda, xaaladaha iyo duruufaha la xiriira shil kasta iyo sababtakeentay;

   c. In ay qaado tallaabooyin looga hortegayo shilalka diyaaradaha.

   d. Waa inay warbixin sugan ka siiso dadweynaha xaalada shilka iyadoo la ilaalinayo danta guud;iyo,

   e. In ay ka gun gaarto waxa ugu wanaagsan ee lagu soo afjari karo ama xadaynayo dib u soo noqoshada shilalka ayadoo samaynaysa cilmibaaris iyo baaritaano ku saabsan arrimaha bed-qabka gooshida hawada iyo ka hortaggashilalka

2. Sarkaakiisha ama shaqalaha u xilsaaran shilalka waxay yeelanayaan awood la mid ah tan maareeyaha HDR xagga xog ururinta amabaaritaanada;

   a. Sharcigani wuxuu Wasaarada u ogolyahay inuu diyaarad kasta oo shil ku lug yeelata, ku sameeyo baaritaan iyo tijaabo lagama maarmaan ah, xaga matoorada diyaaradda, marawaaxdaha iyo qalabka kasta oo diyaaradu ku shaqayso ama hantida saaran diyaaradda ku lugta leh shilkadhacay.

   b. Wasaarada waxaa sharcigani u oggol yahay in ay baarto haraaga meydka qof kastaoo rakaabka kamid ah si loo ogaado heybta qofka iyo arrimo muhiim ah la xirira baaritaanka shilkadiyaarada.

## Qodobka 88aad
## Baabi'inta Caddeymaha Shilka

1. Diyaarad kasta oo rayid ah, matoorada diyaaradda, marwaxadaha, qalabka lagu hago diyaaraddaha, ama hantida saarandiyaaradda shilka gashay waa in la ilaaliyaa, waxaa reeban in wax laga qaado goobta shilku ka dhacay ilaa iyointa baaritaanku socdo si waafaqsanayn xeerarka shilalka u degsan. Qof kasta oo ku xad gudba qodobkan waadembiile.

2. Waxa reeban in qayb ka mid xogaha shilka la baaray ama warbixinada shilalka ee Wasaaradda in loo isticmaalo cadayn maxkamadeed ama in magdhow laguraadiyo.

3. Wasiirku marka uu codsado, laamaha kale ee dawlada iyo Wasaaradaha kale waxaa sharcigani u ogolaanayaa in ay baaritaan ku sameeyaan shilalka diyaaradaha ayna wasiirka u gudbiyaan xaqiiqda, xaaladaha iyo duruufaha ku xeeran arintaas, waxaana loo oggol yahay in uu warbixinadaas ku go'aansado sababaha suurtagalka ah keenayshilka.

## CUTUBKA 13AAD
## DEMBIYADA IYO GANAAXYADA
### Qodobka 89aad
### Dambiyada iyoGanaaxyada

1. Qof kasta oo si ula kac ah u burburiya, uga qaada meeshii loogu talagaly ama waxyeello u geysta hantida HDR ama hor istaagain hantidan lagu qabto hawshii loogu talagalay wuxuu noqon doonaa eedaysane wuxuuna mutaysanayaa ganaax ay go'aamiso Hay'adda ku shaqadaleh.
2. Qof kasta oo hor istaaga ama caqabad ku noqda sarkaal ama shaqaale ka tirsan HDR kaas oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan qodobada Xeerkan ama xeernidaamiyayaashahoos imanaya wuxuu noqon doonaa eedaysnae wuxuuna mutaysanayaa ganaax ay go'aamiso hay'adda ku shaqaleh.

## CUTUBKA 13AAD
## DHAQAN-GELIN
### Qodobka 90aad
### Dhaqangalka Sharciga

1. Dhaqan-gelinta sharciga
2. Sharcigan, kadib dhaqan galkiisa, wuxuu burinayaa dhamaan sharciyadii hore ee dalka uga yaallay duulista rayidka.
3. Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa markii uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, labadiisa aqal, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha Juhmuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro faafinta rasmigaah.

### Qodobka 91aad
### Dhamaystirka Sharcigan

1. Qodobada laga waayo sharcigan waxaa loola noqonayaa heshiiska Chicago iyo mucaahadooyinka Soomaaliya ansixisay ee la xiriira duulista rayidkaah.
2. Sharcigan wixii laga waayo waxaa loola noqonayaa sharciyadii ka horeeyay iyo heshiisyada caalamigaah.

**XEER MADAXWEYNELr.248** Taariikh:17/02/2020

**MAGACAABIS NOOTAAYO**

**MADAXWAYNAHA J.F.S.**

MARKUUARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKUUARKAY: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962kuna saabsan hawlaha Nootaayaha

MARKUUARKAY: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaaboNootaayaha

MARKUUARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Cadaaladda, Ref: WC/XW/E-12/431/018

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhusaxiixo, Waxaa **Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed (Luu)** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

**Qodobka 2aad**

Waxa uu **Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed** ka hawlgelayaa Gobolka Banaadir gaar ahaan Magaalada Muqdisho.

**Qodobka 3aad**

Waxa uuXeerkan Dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.Ssaxiixowaxaanalagusoodaabicidoonaa FaafintaRasmigaeeJ.F.S

**MUQDISHO: 17/02/2020**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/061/2020
TAARIIKH 30/6/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

**MAGACAABIS XUBNAHA CUSUB EE GUDDIGA MAAMULKA BANGIGA DHEXE**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Xeer Lr. 130 ee soo baxay 22/04/2012 kuna saabsan Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed iyo Hey'adaha Maaliyadda Soomaaliyeed

**MARKUU ARKAY**: Go'aanka Golaha Wasiirrada SHGW.0092.02.20 Taariikh: 13/02/2020

**MARKUU OGAADAY**: In ay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Xubnaha cusub ee Guddiga Maamulka Bangiga Dhexe

**MARKUU TIXGELIYAY**: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin mudanayaasha

***Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa Xubnaha Cusub ee Guddiga Maamulka Bangiga Dhexe loo magacaabay xubnaha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin:

1. Prof. XuseenAxmedWarsame Xubin
2. Dr. AuesAboScek Xubin
3. Dr. CabdisamadNuurLooyaan Xubin
4. Mr. Sakhaawe-diinMustafaMaxamed Xubin
5. Mr. CusmaanSalaadGabeyre Xubin

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Xeerkaan Madaxweyne Dhaqangelayaa marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S

**MUQDISHO:16/03/2020**

MadaxweynahaJ.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: Han/060/2020
TAARIIKH 30/6/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

**XEERMADAXWEYNELR.259** Taariikh:06/04/2020

# MAGACAABIS LA-TALIYE MADAXWEYNE EE DHINACA SHARCIGA

## MADAXWAYNAHA J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida loo qabo magacaabista khabiir la-taliye Madaxweyne ee Dhinaca Sharciga

***Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:***

### Qodobka 1aad

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 6da Abriil 2020, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay **Kaise Said Artan** in uu noqdo La-taliye Madaxweynaha ee dhinaca Sharciga

### Qodobka 2aad

Xeerkaan waxa uu Dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S

**MUQDISHO:06/04/2020**

MadaxweynahaJ.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/058/2020
TAARIIKH 30/6/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

**XEERMADAXWEYNELR.267** Taariikh:20/05/2020

## MAGACAABIS AGAASIMAHA HAB-MAAMUUSKA MADAXTOOYADA (CHIEF PROTOCOL)

### MADAXWAYNAHA J.F.S

**MARKA UU ARKAY**: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah Faqradda 1aad Xarafkiisa “A”

**MARKA UU ARKAY**: Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah

**MARKA UU ARKAY**: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan

**MARKA UU TIXGELIYAY**: Baahida loo qabo magacaabista Agaasimaha Hab-maamuuska

***Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkan Magacaabis:***

### Qodobka 1aad

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 20-ka May 2020, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay mudane **Yusuf Hassan Salan** in uu noqdo Agaasimaha Hab-maamuuska Madaxtooyada.

### Qodobka 2aad

Xeerkaan waxa uu Dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S

**MUQDISHO:20/05/2020**

MadaxweynahaJ.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/056/2020
TAARIIKH 30/6/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

**XEERMADAXWEYNELR.273** Taariikh:20/06/2020

**MAGACAABIS MAAREEYAHA GUUD EE HEY'ADDA DUULISTA RAYIDKA SOOMAALIYEED**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKA UU ARKAY**: Qodobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka

**MARKA UU ARKAY**: Sharciga Lr.28 ee soo baxay 19kii Maajo 2020 kuna saabsan Duulista Rayidka

**MARKA UU ARKAY**: Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Summad: XRW0184/05/2020 kuna saabsan Soo jeedin Magacaabis Maareeyaha Guud ee Hey'adda Duulista Rayidka.

**MARKA UU ARKAY**: Aqoonta iyo Waayo-aragnimada ay leeyihiin mudanayaasha loo magacaabayo Xilalkan

**MARKA UU TIXGELIYAY**: Baahida loo qabo in Hey'adda Duulista Rayidka loo magacaabo Maareeye Guud

***Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkan Magacaabis:***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 20-ka Juun 2020, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay mudane **Axmed Macallin Xasan** in uu noqdo Maareeyaha Guud ee Hey'adda Duulist Rayidka Soomaaliyeed

**Qodobka 2aad**

Xeerkaan waxa uu Dhaqangelayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S

**MUQDISHO: 20/06/2020**

JAMHU...IYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/065/2020
TAARIIKH 30/6/2020
...XIISKA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)